


# HOTEL AMISOM

BILE HASHI

MAHADCELIN:

Marka hore: Ilaahayga wax kasta qadara. marka xiggana familkeeyga oo iigu dulqaatay intaan buugaan qoraalkiisa ku mashquulsanaa.

# HOTEL AMISOM

Qiso taabanaysa laabta!




**Bile Hashi**

**Qoraagii buugii “Mukhalas” iyo “Deynabo”**

Premium Desktop Books
Published by Premium Publishing
Stockholm, Sweden

©Bile Hashi
First printed 2016

www.bilehashi.se

Omslag: Jenny Larsson
Tyrckt i Sverige

ISBN 91-639-1739-4

## 1.

Markii ay farmashiyaha dawada weydiisay ayuu wiilkii farmashiyaha iibinaayay taleefan hoosta ka wacay. Wuxuu ciidanka alshabaab wargeliyey inay u timid gabar Amisom xiriir la leh.

Gabadhu waxay wadatay warqad laga soo qoray cisbitaalka Amisom. Dhakhtar Ugaandheeska ah ayaa daawo usoo qoray aabaheed. Aabaheed wuxuu jiifay isbitaalka taliska ciidamada Amisom. Dawo ayay usoo doontay aabaheed oo ildaran .

Warqadi ayaa kashiftay.

Markiiba waxaa farmashiyaha soo hor istaagay wiil bastoolad ku hubaysan.

- Walaal dawadaan ma hayno! Ayuu kii farmashiyaha lahaa kuyiri gabadhi isagoo warqadeedi u celinaya. Wakhti dheer ayuu farmashiyaha ku dhex maaweelinayay.

Marki ay farmashiyaha kasoo baxday waxaa ka hor yimid wiil. Indho qalafsan ayuu ku soo eegay. Bac uu gacanta ku wato waxaa ugu jira bastoolad. Bastooladi ayaa u muuqatay gabadhi. Wey ka leexatay. Wuxuu isku dayay inuu markale soo hor istaago oo uu la hadlo. Dad baa soo kala dhex galay.

Wey ka socod boobsiisay meeshii.

In yar markii ay socod boobisiinaysay ayay bilowday inay rucleyso. Shan ilaa toban talaabo markii ay rucleysay ayay markale gadaal u soo eegtay. Markay aragtay inuu dadka soo dhex jiiraayo oo uu xageeda usoo ordayo ayay iyaduna oroday.

Naftu orod bey kugu aamintaa! Dadkii suuqa buuxay ayay dhex jiirtay iyadana.

Mid ay garabka ku dhufato oo ka daba qeyliya iyo mid ka hor yimaada oo ka leexda ayay dadku noqdeen. Toban ilaa labaatan talaabo markii ay ordeyso ayay dib usoo eegtay misna.

Gadaasheeda ayuu ordayaa. Islaan ay iyada soo jiirtay oo ka daba qeylinaysa ayuu isaguna soo jiiray.

Nin indho la' oo tuugsanaya oo ka horyimid

www.bilehashi.se

ayuu kala tuuray isagoo gabadha aan isha ka qaadin. Cammihii jidkii ayuu ku dhacay. Waxaa xigay Islaan jiirigaan madaxa ku sidatay oo uu jiirigaankii ka ridey!

Waddo cusub ayay u leexatay. Wuu ka soo daba leexday.
Intuu ordayo wuxuu isha ku hayaa iyada. Intey ordeyso ilaah bay baryaysaa.

Intuu dad jiiray midna ma uusan raaligelin.Iyada ayaa u caddayd!

Waddadii cusbeyd ayuu kala soo leexday. Suuqii khudaarta ayay soo dhex galeen., Wuu daba ordayaa.

Markuu u dhow yahay gabadhi ayuu gaari xamuul ah oo khudaar laga dajiyey meeshi ka dhaqaaqay. Gaarigi ayaa kala dhex galay. Gaarigi markuu dhaafay ayuu Gabadhii waayay!

Xagay ka baxday? Ma bakhaar ayay gashay? Ma waddo kale ayay u leexatay? Wadooyinkii jidka weyn ka leexanayay ayuu isha la raacay. Marki hore bidix hadana midig! Bakhaar ayuu galay. Uma muuqato! Waddadi bidix nasiibso isagoo isleh ayuu arkay iyadoo hoos fadhisa miis ay islaan ku dul iibinayso qare.

Markay aragtay inuu arkay ayay u istaagtay oo carartay. Waddo dhuuban oo suuqa ka baxda ayay qabsatay. Islaamihii khudaarta dhulka ku iibinayay ayayay kasii dul talaabsatay.

Jidkii weynaa ayay soo goysay, xaafado suuqa u dhawaa ayay soo dhex gashay.

Waxaa ka hor yimid ninkii ay ka cararaysay!
Dib ayay u cago guratay! Guri albaabkiisu furnaa ayay dalaq tiri, “nin alshabaab ah ayaa i bursanaya eedo!” Ayay u qeylisay islaan sheyb ah oo daashka fadhisay!

- Maxaad ahayd adiguna?

- Reer Doogleey ayaan ahay! Ayay usheegtay inaysan ahayn dadka magaalada daga.

Islaantii oo ilinka gabadhu kasoo gashay usii socota si ay u hubsato ninka la sheegayo inuu gabadha bursanayo ayay darbigi gaabnaa ee reerka ka booday.

Reer kale ayay usoo dhacday. Gabar ayaa daashka burjiko ku babinaysa. Way aragtay inay gabadhu isku naxday. Tuug ma ahi! Ayay hoos ugu sheegtay.
- Shshshsh aamus.. ayay gabadhi burjikada babinaysay u baaqday iyadoo farta dib-

www.bilehashi.se

naha saaraysa. Shshshsh...

Aqalkii kale ayay ilinkiisi iska furtay. Wey ka sii baxday. Markii ay ilinki ka baxday ayay tii burjikada babinaysay afki furatay!

Deriskii ayaa isku soo baxay. Wiil labandaayo dhar kasoo qaatay oo gabadha ordeysa arkay ayaa deriskii usheegay inay dhinacaas usii ordeyso.

Ninki gabadha suuqa kasoo raacay ayay u muuqatay iyadoo meel fog sii ordeysa.

Wuxuu arkay gabadhi humaageedi oo galbeedka usii ordeysa. Qoraxdii oo sii dhacaysa, cirki oo gudcur sii noqonaya ayuu arkay humaageedi oo sii fogaanaya.

Waddo cusub ayuu qaatay maadaama uu magaalada si fiican u kala yaqaanay.

Labandaayadii ayuu la leexday, dhowr guri markuu dhaafay ayuu masaajid meesha ku yaalay la leexday.

Markuu masaajidka la siman yahay ayuu mu'adinkii adinki bilaabay. Ma foga! Ayuu niyada iskaga sheegay isagoo dhagihiisu soo gaarayo mu'adimka codka qurxoon!

Haye cala salaah... Haye calal falaax”

Iyadoo xiiqaysa ayay soo ag istaagtay guri hortiisa laga dhisay mooro lo’. Wey foorarsatay. Gacmaha ayay jilbaha ku qabsatay si ay u neefsato. Mooradu ood ayay ka dhisan tahay saa oo ay tahay waxa ku jira ma muuqdaan.

Mugdigi oo sii o xoogsanaya ayay xeradii xabad xabad iskugu tuurtay. Waxay aragtay labo sac oo isku naxay markay gabadhi arkeen.
Dhulka markay xabadka dhigatay ayay aragtay inuu dhulku qoyan yahay, diggo maradeeda qooyay ayay dareentay.

Intii ay maradeeda eegeysay ayay aragtay ninki bursanayay luguhiisi isagoo moorada gees maraya.
Uma ekeyn mid daalay, orod xowli leh ayuu ku ordayay balse markuu xerada lo’da soo gaaray ayuu istaagay.

Wadnaheedi ayaa cabsi la garaacmay! Labada gees ayuu ninku eegay. Wuu u muuqdaa. Afka ayay gacanta ku qabsatay. Waxay hoosta uga duceysatay inaysan reerka lo’da leh aysan xilligan usoo kicin inay lo’da listaan. Oo ay markay arkaan gabadha qeyliyaan, dabadeedna uu ninka bursanayay uu halkaa ku toogto.

www.bilehashi.se

Waxyar markuu taagnaa ayuu hore u sii rucleeyey!
Wax saacad ku dhawaad ah markay xerada lo'da jiiftay ayay kasoo baxday. Iyadoo gaagaatamaysa ayay waddadii uu wejigeedu qabtay qabsatay. Afarta jiho waxba iskuma dhaamin. Magaaladuna ma ahayn mid ay kala taqaano.

Waxay Magaalada timid maalinkaas waagu intuusan baryin.
Waxay magaalada la timid aabaheed oo in badan sariir saarnaa. Waxay kasoo safreen tuulo la yiraaho Doogleey.
Magaalada waxay u yimaadeen cisbitaalka. Markii la qaabilayna aabaheedna, dhakhtarku wuxuu u qoray dawo uu ugu tilmaamay inay suuqa bakaaraha uga soo iibsato aabaheed.

Markii ay suuqa soo tilmaansatay waxay xirneyd cabaayad. Cabaayada waxaa uga hooseeyey guntiino. Guntiinada dhexda waxaa ugu guntanaa warqada dhakhtarka iyo lacag ay soo tuugsatay.

Warqada dhakhtarka oo nafteeda halista galiyey waxaa ku shaabadaysnaa shaabada cisbitaalka amisom, taas oo dhagarqabaha farmashiyaha jooga galisay tuhun inay gabadhu xiriir la leedahay ciidanka

shisheeye ee wadanka qabsaday.

Si uu taa u hubiyana wuxuu wargeliyey ciidanka sirta ee Alshabaab oo magaalada weli si sir ah uga howlgala.

In yar markii ay xaafadihi dhex socotay, salaadii cishana la tukaday ayay garatay inaysan reerkeedi iyo cisbitaalki midna u hoyan karin caawa.
Hore ayay iskaga sii soctay xaafadihii. Waddadii ay ku socotay ayaa soo dhamaatay. Waxaa ka hor yimid baddi. Xeebti ayay dhowr talaabo usii qaaday. Baddi oo mugdi ah ayaa ka hortimid. Wey istaagtay. Cirka ayay eegtay "Ilaahayoow caawa i nabadgeli" ayay duceysatay.

Xeebtii oo aan cidna joogin ayay badda dhinac qaaday. Xageed u socotaa? Ayay isweydiisay. Ma garanaynin halka ay u socoto, waxay ogeyd oo kaliya ama ay rajaynaysay inay kasoo fogaanayso ninkii galabta suuqa kasoo bursaday. Wey ogeyd inuu alshabaab ahaa. Wax badan ayay shabaab aragtay. Doogleey iyagaa ka talin jirey, si fiican ayay u taqaanaa waxay yihiin iyo waxay galaanba.

Way fadhiisatay.

Waxay salka dhigatay ciidi. Carro maayo

www.bilehashi.se

ay dabayshu u dhistay sidi buur yar ayay salki la heshay. Wax badan ayay kasoo fogaatay hirki badda.
Lugaheedu wey daalanaayeen, madaxeedu buuqii suuqa iyo dadkii badnaa oo aysan u baran ayaa ka qeylinayay. Caloosheedu wey marnayd. Soortii ay saakay gurigooda kasoo cuntay ayaa raashin ugu danbeeyey.

Inyar markii ay dhagaysanaysay hirka badda ayaa waxaa usoo uray diggadii cabaayadeeda qooyay. Gacanta ayay labadeeda cajar marisay. Waxaa soo raacay diggo moorada kasoo raacday. Carro maayo ayay dhinaceeda sacab ka soo buuxsatay. Cabaayadii ayay marmarisay gacanta. Cabaayadu wax badan ayay qoyan tahay, intii dhulka gaartay ayay diggadu gaartay.

Geesaha ayay iska eegtay. Wax socda ma leh. Wax aan hirka badda ahayn ma maqlin. Markay hubsatay inay keligeed tahay ayay cabaayadii iska siibtay. Guntiino ayay ku wadatay cabaayada hoosteeda.

Dhexda guntiinada ayay ugu guntanaayeen lacagti iyo warqadi dhakhtarkaba. Iyadoo taagtaagsanaysa ayay hirki badda ka hortagtay. Dabadeedna intay kadaloobsatay ayay cabaayadii diggada wadatay biyihi hirka ku dhaqday. Meeshii ay fadhisay ayay u noqotay markay cabaayadii dhaqa-

tay. Cabaayadii ayay dhulka ku kala bixisay meel agteeda ah.

Wey iska fadhiisatay.

Waxay dareentay inay hurdo la luloonayso, inuu jirku qarqarayo. Dabayl aan badneyd balse qabow ayaa xagga badda kaga imaanysay indhaheeduna wey is qabqabsanayeen.

Caloosha ayay gacanta ku qabsatay markay dareentay inay gaajo badan hayso. Dhabarka ayay dhulka dhigatay. Circa ayay eegtay. Dayaxa ayaa u muuqday. Cirku waxaa buuxay caad aad moodo inuu si xowli ah galbeed ugu sii guurayo. Ma bishaa socota mise caadka? Ayay isweydiisay iyadoo dhabarku dhulka u yaalo indhihuna sii gam'ayaan.

Xeebta ayay ku gama'day.

Subixi markii ay indhaha kala qaaday waxay aragtay inay kasoo toostay meel aan ahayn halkii ay kasoo toosi jirtey. Maskaxda ayaa markiiba soo xasuusisay halkii ay xalay ku gama'day. Iyo sidii ay u gama'dayba.

Waxay afki iyo wejigi kusoo mayratay biyihi badda. Cabaayadeedii oo qalayl iyo

www.bilehashi.se

qoyaan u dhaxaysa ayay korka ka gashatay. Waxay u dhaqaaqday xaafadihii xeebta u dhawaa. Gabar rooti naadinaysa oo ka iibinaysa reeraha xeebta ag degen ayay istaajisay. Kaalmo ayay weydiisatay. Waxayu sheegtay inya tahay qof misaafur ah.

- Anigaba sideed carruur ah ayaan ka masruufaa danbiishaan yar ee idhaaf ayay tiina ugu jawaabtay.

Marki ay weydiisay dukaanka daawada meel uu ku yaalo rootileydu waxay ahayd mid kaalmaynaysa. Waxay u tilmaantay laamiga inay tagto. Waxaa ku yaala dhowr farmashiye. Ayay tiri.

Waa subax arooryaad. Waxay timid laamigi dukaamadii oo weli xiran. Meel geed hoostiis ah ayay iska fadhiisatay.

Jidka waxaa soo maraayay gawaari tiro yar, marmar waxay arkaysay yaanyuuro isbursanaya oo jidka soo gooynaya ama sii gooynaya, gaari gacanle keligiis socda oo heesaya, ama mid dameer u raran yahay oo dameerka marka uleynaya marna hor socda. Qoraxda ifkeeda wuxuu wada gaaray khalqiga eebe, dad iyo duunyo intii isheedu qabato. Waxaa sii kordhayay kulka qoraxda intii ay sugeysay in farmashiyaha laga furo.

Isha ayay kala socotay waxa laamiga ka dhacaya. Dadka iyo gawaarida sii socda ama soo socda, ifka iyo kulka qoraxda sida uu khalqiga u gaarayo, cayayaanka agteeda maraya, dakhsiga iyo wariiriga, quraanjada hoosteeda socda ayay daawanaysay.

Markuu laamigii soo camirmay, dukaamadiina la furay ayay farmashiyihi jidka ku yaala u dhiibtay warqadi ay dawada magaceeda ugu qorneyd ee dhakhtarku soo siiyey. Inta aysan u dhiibin warqada waxay eegeysay ninka farmashiyaha iibiya, sidi inay kala garan karto inuu dhagarqabe yahay iyo inkale.

Hadii ay sida wax loo qoro ama akhriyo aqoon lahayd, hadii ay iskuul soo dhigan lahayd waxay warqada ka akhrin lahayd dawada magaceeda, dabadeedna waxay ninka farmashiyaha u sheegi kari lahayd dawada magaceeda. Balse weligeed iskuul ma dhigan. Labaatanka sano oo uu cimrigeedu ka kooban yahay Doogleey kama jirin iskuul.

§

www.bilehashi.se

## 2.

Magaceeda waxaa layiraahdaa Guduudo Abiikar Axmed. Da'deeda waa labaatan sano. Waxay ahayd currada Abiikar Axmed iyo Luul Maxamuud. Guduudo waxaa ka yaraa gabar iyo labo wiil. Arliyo oo ahayd da'da ku xigta Guduudo waxay ahayd 18 jir. Arliyana waxaa ka sii yaraa Afrax iyo Xirsi oo kala jiray 9 iyo 4.

Reer Abiikar intaas ayuu ka koobnaa. Waxay ku noolaayeen tuulada Doogleey oo duleedka koonfur kaga taala Xamar.

Inkastoo ay magaaladu wax badan u jirin hadana carruurta Abiikar magaalada Xamar labo goor ayay tageen. Mar waxay ahayd mar ay abaaro jireen oo raashin magaa-

lada lagu sheegay, raashinkaas oo dadka loogu qeybinaayay tirada reer kastaa uu ka kooban yahay. Sidaas darteed ayay maalinkaas reer Abiikar oo dhan magaalada usoo aadeen. Marna waxay ahayd mar ay dagaalo ba'an dhexmareen ciidanka dowlada iyo Alshabaab. Markaas oo ay reer Abiikar usoo barakaceen magaalada. Dagaalkaas oo isbuuc ku dhawaad socday markuu joogsaday ayay reer Abiikar kusoo noqdeen Doogleey.

Labada waalid aabe Abiikar iyo hooyo Luul magaalada wey kala yaqaaneen, inkastoo ay isku dhaameen. Abiikar wuxuu magaalada iman jirey lix maalmood isbuuciiba oo magaalada ayuu usoo shaqo tagi jirey. Wuxuu waagiisii hore ahaa kirishbooy balse sanadihi ugu danbeeyey wuxuu shaqo ka helay garaash gawaarida lagu sameeyo.
Hooyo Luul waxay iyadana magaalada u soo qaadi jirtey khudaarta ay beerato si ay ugu iibiso. Magaalada waxay aad u kala taqaanay suuqa bakaaraha iyo suuqa Xamarweyne halkaas oo ay macaamiisheeda ka heli jirtey.

Habeen habeenada ka mid ah ayay Guduudo hurdadii ka soo booday iyadoo neeftureysa. Waxay kasoo baxday mundulki ay ku jiifeen iyada iyo walaalaheed Arliyo iyo

www.bilehashi.se

wiilasha yaryar. Waxay riyootay riyo aad u xun. Waxay riyo ku aragtay aabaheed oo xabaalaha loo sii wado. Si fiican ayay riyada u arki kartay dadka marxuumka sii wada, qabuuraha, qabriga iyo karfanta cad intaba si fiican ayay ugu muuqdeen. Xataa markii ay riyadi ka soo toostay si fiican ayay u xasuusatay. Mundulka ay iyada iyo walaalaheed jiifeen Mundulka ku dhegen waxaa jiifay aabaheed Abiikar iyo hooyadeed Luul. Dhowr mar ayay damacday inay qolka ugu gasho iyagoo jiifa. Hadana waxay isku sheegtay inay gabar weyn tahay oo ay anshax xumi tahay inay walidkeed oo jiifa qolka ugu gasho. Xoogaa markii ay gambar daashka yaala ku fadhisay ayay "ilaah barisay. *Ilaahayoow aabahay ha iga qaadin"* ayay ku duceysatay iyadoo dayaxa iyo xidigaha eegtaysa.

Cirku wuxuu ahaa bilaa caad habeenkaas. Roob ayaa ilaa fiidki da'ayay. Wuxuu reebay dhaxan iyo udug. Iyadoo daashkii weli fadhisa, eegeysana xidigaha cirka madow ku sharaxan ayaa waxaa soo hor istaagay labo rah oo boodboodaya. Rahha markuu roob da'o oo uu xareeda ka dhargo waxaa caan u ah inay iyagoo raxan raxan u boodboodaya dibeda usoo baxaan. Way ogeyd saas. Kama cabsanin markay horteeda soo istaagen labadi rah oo is daba boodaya.

Balse kuwaanu ma ahayn labo rah oo caadi ah. Markey Guduudo horteeda soo istaageen ayay joojiyeen inay boodboodaan. Guduudo isma aysan dhaqdhaqaajin. Rahhi ayay eegtay. Waa saqdhexe oo ay reerkoo dhan jiifaan. Labadi rah ayaa mid meeshi ka dhaqaaqay. Kii kale ma raacin ee Guduudo ayuu la joogay. Wey eegtay. Malaha isagana iyada ayuu soo eegayaa? Tolow muxuu rabaa inuu ii sheego? Ayay isweydiisay. Wey ka sugtay, ilaa uu jirkeedu qarqaro oo ay dhaxanta ka xarooto. Markay meeshi ka kacday ayuu isna meeshi ka tagay.

Waxay u noqotay mundulkeedi. Derinteedi ayay timid. Waxaa dhinac jiifay Arliyo oo ay derinta weyn qeybsan jireen. Dhinacooda kale waxaa iyagana derin kale jiifay labada wiil oo yaryar oo ay walaalaha yihin Afrax iyo Xirsi.

Habeenkii markii ay hurdayaan si fiican ayay wiilashu u seexdaan laakiin markay habeen danbe noqoto ayay barkimahoodi ka kala tagaan oo dhinac qaldan u seexdaan. Xirsi inta badan wuxuu u seexdaa dhabarka oo dhulka u yaala, laakiiin Afrax wuu is kaduudaa, jilbaha ayuu wejiga u dhaweystaa oo isagoo dhan jirkiisa isku aruuriyaa ilaa aad moodo inuu derintaba ka dhacay.

Intey dul istaagtay wiilashi ayay barkima-

www.bilehashi.se

hoodii madaxa ugu toosisay.

Arliyo iyo Guduudo waxay ahaayeen labo gabdhood oo gashaanti ah. Da' ahaana wey isku xigeen. Inta aan la seexan waxay ka sheekeysan jireen waxwalba. Waxay wadaagi jireen xan iyo sir waxa ay midwalba soo ogaatay. Doogleey dadkeeda, dookhooda iyo dhaliishooda ayay kala dhigdhigi jireen. Ilaa ay saqdhexe ku gaaraan iyagoo qoslaya. Sidaa oo ay tahay carruurta iyagaa iskugu ximin ogaa, mararka qaarna wey isku soo boodi jireen oo wey isku gacan qaadi jireen. Taas oo sababi jirtey in hooyo Luul ay labadooduba ciqaabto.

Hadana iyagaa dad iskugu dhawaa iskuguna jeclaa. Marar badan ayay dhici jirtey inay hooyo Luul mundulkooda ugu soo gasho iyagoo hoos u qoslaya saqdhexe. Markaasay intey canaanato ku odhan jirtey "Maxaad saacadaan isku akhrinaysiin, ha la seexdo, wiilasha yaryar ha idinka jiiftaanee" Waxay kaloo sirta wadaagi jireen markay timaha isku dabayaan taas oo keeni jirtey inay isku warramaan saacado badan.
Guduudo waxay ahayd qof aad u furfuran. Waxay raacday hooyadeed ayay dadku dhihi jireen. Halka Arliyio ay ka ahayd qof ka fiirsada waxa afkeeda soo dhaafaya. Dadka ku cusubna badanaa wakhti dheer

ayay ku qaadan jirtey inay Arliyo ugu furfurmato.
Ma aheyn dabeecadda kaliya. Guduudo waxay kaloo hooyadeed ka raacday xataa muuqaalka. Wey dhiig furneyd sidii hooyadeed ayayna dhuubneyd oo dheereyd, fanaxdeeda weyn waxaa la wadaagay hoyadeed iyo walaalkeed Afrax oo isagana fanaxda ku dhashay.

Arliyo waxay raacday aabaheed. Wey madoobeyd, wey kuusneyd, timaheeduna kuwa Guduudo wey ka adkaayeen. Sidii aabaheed ayayna ahayd qof aan hadal badneyn.

Sirtooda badankeeda wey wadaagi jireen. Balse waxkasta iskuma sheegi jirin. Hadii waxwalba la wadaago sow fadeexo weyn ma dhacayso? Waxyaalaha qaar waxay ku fiican yihiin inay keligaa kugu ekaadaan.

Arliyo waxay niyada ka jecleyd inay sida walaasheed u dhiig furnaan lahayd una dheer tahay, balse sirtaas weligeed uma sheegin. Guduudo inay wiil timoweyne loogu neynaaso ay la haasaawdo cidna uma aysan sheegin.

Timoweyne iyo Guduudo waxay maalintii koowaad isku arkeen Guduudo oo ceelka biyo kasoo dhaaminaysa iyo Timoweyne

www.bilehashi.se

oo xoolo uu watay ka waraabinaya.. Waxay markaas Guduudo la da'ahayd inta Arliyo tahay maanta, sideed iyo toban gu. Markay indhahoodu isku dhaceen wey qajishay oo hoos ayay eegtay. Sir sir ayay dhowr jeer wejigiisa u eegtay iyadoo wadaanta soo qabanaysa.

Maalintii labaad waxay kulmeen bil ku dhawaad kadib. Malaha maalin walba ayuu wiido ceelka u iman jirey!

Wuxuu subaxaas u istaagay jidka. Geed weyn ayuu ugu gambaday laakiin Guduudo wadnaha ayaa garaacmay markay u muuqdeen xoolihiisi oo ay garatay summadooda. Waxay garatay inuu Timoweyne meel fog jirin hadii ay xoolihiisu meesha daaqayaan.

Gabdhihi ay la socotay ayay ka hartay. Cagta inay cuncunayso ayay ku marmarsiyootay. Ashuunkii ay madaxa ku wadatay ayay dhulka dhigtay. Iyadoo lugta xoqanaysa ayuu dul yimid. Salaan iyo bariidin kadib wuxuu weydiiyey magaceeda. Isna magaciisa ayuu u sheegay. Markay kusoo baxeen wiilal xer ah oo waddada maraya ayay kala carareen.

Mar sadexaad ma aysan kulmin inkastoo ay dhaan been ah u baxday marar badan

balse ay ku lug go'day ceelki. Dhowr habeen ayuu riyada ugu yimid oo iyadoo dhoolacadeyneysa soo toostay.

Darinteedii ayay kusoo noqotay. Arliyo ayay dhinac jiifatay. Habeenkaas intii ka harsanaa oo dhan ma aysan gam'in. Waxaa hortaagnaa sawirka aabaheed oo xabaalaha loo sii wado!.

Rahhi muxuu rabay inuu iisheego ayay isi su'aashay.

Iyadoo aanan weli gam'in ayuu diiqii aay Faay qeyliyey.

Aqalkooda labada mundul iyo musqusha ka kooban waxaa ku wareegsanaa derbi laga dhisay ulo iyo diggo ari. Aqalkooda waxaa kasoo horjeeday guri ay ku nooshahay islaan la yiraaho Aay Faay.

Aay Faay waxay ahayd islaan keligeed nool. Wiil ay dhashay oo Xeyle la odhan jirey wuxuu u baxay Xamar dhowr sano ka hor, kadibna masoo noqon. Dersika waxay ku xantaan inuu ciidanka qaranka qortay kadibna dagaalo lagu dilay. Laakiin aay Faay waxay sheegtaa inuu wiilkeedu nool yahay oo uu iman doono mar aan fogeyn.

www.bilehashi.se

Aay Faay waxay lahayd harqaan ay ku shaqaysato, iyo digaag badan.

Aqalka reer Abiikar waxaa dhinaca uga dhegenaa guri tarniig iyo baakado ka samaysan oo uu ku noolaa Odey Xuud oo isna ahaa nin weyn o keligiis nool. Dadku waxay ku xaman jireen inuu dagaaladii sokeeye ka qeybqaatay oo ay maskaxdiidu dhamayn. Mararka qaar wuxuu Odey Xuud ugu hanjabi jirey Faay inuu ka toogan doono diiqeeda haduu subax danbe hurdada ka qaso. Odey Xuud weligiis ma guursan.

Guduudo markay maqashay inuu diiqii aay Faay ciyey waxay ogeyd in waaguna baryay.

Hurdo iyo Caanaba inta ugu danbeysa ayaa ugu macaan! Waxay aragtay Arliyo oo agteeda jiifta oo dhinac isku gedgedinaysa, derintana isku dhejinaysa.

Guduudo dhabarka ayaa dhulka u yaal. Wey soo jeeda, hurdo kama aysan soo toosin. Wey soo jeeday intuusan diiqu ciyin. Waxay gashay inay maalinta cusub ee dhalatay ay qorsheyso.
Wey soo toosi jirtey, hooyo markay burjikada dabka u shido ayay iyadana canjeeradi la diyaarinaysaa. Arliyo iyadoo hamaah-

sanaysa ayay musqusha aadaa. Wey isku daahisaa.! Aabe ayaa ku qeylinaya inay kasoo baxdo musqusha hadii kale uu shaqada ka daahayo. Subax walba sidaas ayaa loogu qeyliyaa. Hooyo wiilasha ayay wejiga u dhaqdaa, kadibna shaaha ayay dabka saartaa. Arliyo markay musqusha kasoo baxdo waxaa loo diraa inay kirliga shaaha dabka ka dejiso, maacuuntii wax lagu cuni lahaana inay soo bixiso.

Aabe ayaa quraacda loo geeyaa markuu salaada subax tukado. Isagoo saligiisa fadhiya ayaa quraacda loogu geeyaa. Koob shaah bigeys ah, afar xabo canjeero ah, saliid iyo sokor aan badneyn korka looga shubay. Bariis iyo waslad hilib ayaa loogu ridaa caag ay saliid ka dhamaatay. Boorso harag ka samaysan ayuu ku ritaa. Waa qadadiisi malinkaas.
Markuu Abiikar lebisto, albaabkana reerka usoo laabo ayay carruurta iyo hooyadood quraacdaan. Hooyo Luul qudheedu wax badan Abiikar kama danbeyso. Beerta ayay aadi jirtey. Beerta waxay ku taalay tuulada geeskeeda koonfureed meel nus saac loo lugeeyo. Dumar tobaneeyo ah ayay Luul beerta wada falan jireen. Luul waxay lahayd dhul afar gees ah, oo dhinac walba shan talaabo la dherer ah. Waxay abuurtaan khudaar kala nooc ah, oo ay Xamar u suuqgeeyn jireen. Abiikar markuu baxo

www.bilehashi.se

ayay iyadana Xirsi dhabarka ku xiran jirtey, gacantana yaambadeeda ku qaadan jirtey oo cidda macsalaamayn jirtey.

Guriga waxaa iskugu soo hari jirey oo howsha guriga ku filan Guduudo iyo Arliyo. Afrax iyagaa looga tagi jirey, biyaha iyagaa cida usoo dhaamin jirey, qadada ayay sii karin jireen, dhulka ayay xaaqi jireen oo bilbili jireen, isbuuciba mar ayay dharka balli aan fogeyn kusoo dhaqi jireen. Cashadana wey sii diyaarin jireen inta aysan Aabahood iyo hooyadood soo noqon maalinkaas.

Shaqada guriga ma aysan kala lahayn mana loo kala qeybin. Hooyo Luul waxay rabtay inay iyagu is xilqaamaan. Mararka qaar hooyo Luul waxay soo noqon jirtey labada gabdhood oo mid gafuurka taagayso. Waxay ogeyd inay maalinkaas howsha guriga ku heshiin waayeen. Sidaa oo ay tahay hooyo Luul waxay ku odhan jirtey waxaad tihiin gabdho waaweynoo gashaantiyo ah waa inaad baratiin isku sabarka iyo dhabar-adeyga.

Marmarka ay ugu daran tahay waxay midood u dacwoon jireen deriska maadaama hooyadood ay beerta ku maqan tahay. Aay Faay oo guriga kasoo horjeeda ku nooleyd

ayay dacwo ugu tagi jireen? Aay Faay waxay ahayd gurijoog ku nool digaageeda iyo harqaan ay dadka dharka ugu toli jirtey.

Waxaa iyadana guri joog ahayd Eedo Sareedo oo degeneyd guriga aay Faay kan ku dhegen. Sareedo iyadana ninkeeda ayaa lacag u keeni jirey. Ninkeeda wuxuu imaan jirey sanadkiiba mar. Bil ayuu la joogi jirey kadibna wuxuu aadi jirey magaalada halkaas oo uu ka shaqaysan jirey. Wixii uu helo wuu aruursan jirey ilaa laga gaaro bishi uu Doogleey iyo reerkiisi aadi lahaa.

Wuxuu Sareedo iyo carruurteeda u iman jirey isagoo lacag badan u wada. Bishaas uu la joogo sanad walba waxay qaadi jirtey uur. Markuu soo noqdana tirada caruutiisa waxay ahayd kuwii hore oo ku lagu daray.

Sareedo waxay mar Guduudo u sheegtay inay isqabeen iyada iyo ninkeeda sideed sano, waxayna u lahayd sagaal cunug. Markii ay weydiisay sidey ku dhacdayna waxay u sheegtay in labo ay mataano yihiin.

- Wax mataano ah ilmahaaga ma jiraan,

www.bilehashi.se

mataanaha wey isku eg yihiin! ayay Aay faay maalin ku tiri Sareedo. Dagaal la isku soo baxay ayaa xaafada ka dhacay.

Sareedo waxay ahayd islaan aad u naxariis badan balse wey cod dheereyd, weyna hadal badneyd. Mararka qaar sida uu Odey Xuud uga sheegto diiqa aay Faay, ayay aay Faayna uga sheegan jirtey codka dheer iyo hadalka badan ee Sareedo. Doogleey dadka ku nool waxay u badnaayeen dad sabool ah. Ragooda ama wiilashooda ayaa reeraha qaar magaalada uga soo shaqayn jirey, reeraha aan labadaasba lahayna hooyooyinka ayaa khudaartay abuurtaan magaalada u qaadi jirey.

Maalinti ay magaalada yimaadeen ciidanka Alshabaab waxay dumarkii ka mamnuuceen inay khudaartii u qaadaan magalada. Waxaad u baahan tihiin cuna wixii kalena mujaahidiinta ku wareejiya ayay ku amreen. Beerti markay soo go'do mujaahidiinta ayaa goobta iman jirey oo kala maamuli jirey mirihi soo go'ay. Basashi, digirti, galaydi, babaaygi, basbaaskii, liinti iyo yaanyadii. Wixii ay reeraha masruufkooda ku filan mooyee intii kale mujaahidintaa gawaari ku raran jirey.

- Magaalada murtad baa buuxa! Ayay u sheegeen. Murtad inaad khudaar ka iibisaan na waa dambi.

- Waxa aan magaalada kusoo iibino waxaan kusoo bedelanaa raashinka kale oo aan u baahan nahay sida saliid, sokor, bariis iyo baasto. Ayay dumarki u sheegeen wiilashii Alshabaab.
- Murtad la masruufo waa danbi, hadalka badana ma fiicna!

Reeraha qaar waxay nasiib ku lahaayeen ragooda ayaa magaalada uga soo shaqayn jirey oo saliida iyo sokorta u keeni jirey.

§

www.bilehashi.se

## 3.

Aabaheed oo xabaalaha loo sii wado ayay ku riyootay. Rah baa u yimid saqdhexe dhulkoo mugdi ah oo wuxuu u sheegay aysan fahmin.

Saaka ayay aragtay riyadii oo run ah. ayay istiri

Salaadi subax markuu tukaday ayaa lagu soo booday aabaheed Abiikar. Matag ayuu ka kacay. Saliguu ku tikaday salaadi subax isagoo ay jilbuhu u saaran yihiin ayuu carrada isyiri ku matag. Ma calool maran baa matagaysa? *Caaaac* ayuu qufacay mar iyo labo iyo sadex qufacay, markale ayuu misna isku dayay.

Wuxuu dareemayaa lalabo. Candhuuf wax ka badan markay ka iman weysay ayuu beerta derinta ku qabtay. Luul iyo carruurti oo yaaban ayaa kusoo kala orday markay matagiisa maqleen.

- Maxaa kugu dhacay aabe? ayay Guduudo weydiisay aabaheed iyadoo agtiisa soo kadaloobsanaysa. Inti kale weli wey taagnaayeen.

- Calooshaa i walaaqmeysa Aabe! Ayuu u sheegay isagoo caloosha gacanta ku haya. In mindi af leh la igu jeexayo ayaad moodaa.

Luul ayaa biyo ula soo oroday. Koob shaah oo kulul markuu biyihi ka dab ageeyey ayay calooshu degtay.

Roob cusub ayaa xalay curtay. Saacdihii danbe ee xalay ayuu kusoo toosay hilaac iyo gugac jabaq dheer. Diiqii aay Faay markuu ciyeyna roob ayay cirki iyo dhulki isqabsadeen.

Saliga ka istaag markuu isyiri ayuu dareemay inuu wareerayo. Isagoo sii dhaci raba ayay Luul garabka qabatay oo saligi fadhiisisay. Carruurta intooda kale meel

www.bilehashi.se

aan fogeyn ayay safnaayeen. Waxa aabe saaka kusoo booday ayay yaabanaayeen.

Mar ayuu matag hadana lasoo booday. Shaahi uu cabay iyo xab dhiig wata ayuu soo tufay. Wejigiisa dhidid buu soo daadiyey. Markuu bogtay ayuu misna saligii ku dhacay isago caloosha gacanta ku haya.
Carruurti cabsi baa gashay. Luul wejigeeda cabsi kama muuqan balse waxay la welwelsanayd waxa kusoo booday ninkeedi.

- Waan fiicanahay! Ayuu kadibna kuyiri.

Waan seexanaa waxyar ee albaabka iiso laaba!

Inta aysan alabaabka usoo laabin waxay Guduudo aragtay in aabaheed uu xanuun la dhididaayay, indhiisuna ay guduudnaayeen. Isagoo xabaalaha loo sii wado ayay habeen dhexdaas ah ku riyootay. Wey ogeyd.

Maadaama roob badan uu subaxaas socday burjikadu waxay ka shidneyd Qolka Abiikar iyo Luul. Daashka oo quraacda lagu diyaarin jiray waa loo bixi waayay.

Markuu Abiikar ka codsaday inuu inyar seexanayo, hooyo Luul iyo carruurteedi waxay burjikadii iyo quracdi ula soo guureen qolka carruurta. Burjukadii oo ay dhuxushu ka holceyso, birtaawadii, digsigii burka qamiirka ahaa uu ku jiray, kirligii shaaha, caagii saliida qaaddo iyo saxan, wixii dhamaa ayay k asoo rarteen. Qolkii carruurta ayay usoo guureen.

Guduudo waxay xasuusatay riyadii habeen dhaw ay riyootay. Cidna uma aysan sheegin. Alaabti ayay hooyadeed lasoo rartay.
Riyadi ayaa welwel cusub gelisay. Cabaar markay joogtay ayay dareen xun laabta ka dareentay. Waxay dareentay sidi in wax kurus geel ah la'eg ay caloosha u fadhiyaan. Wax qaboow oo adag. Caloosha ayay gacanta saaratay. Balse dareenku wuxuu saaqay jirkeedo dhan. Waxaa cabsanaysay. Waxay soo xasuusatay aabaheed o xabaalaha loo sii wado. Riyadii habeeen hore ayaa sidii filin uga shidmay madaxeeda.

- Maxaad la aamusan tahay? Ayay hooyadeed weydiisay.

www.bilehashi.se

- Waxba! Ayay u jawaabtay.

Hooyo Luula markii ay dhowr xaboo canjeero ah birtaawaha kasoo dejisay ayay Guduudo u dirtay inay soo qaado sonkortii oo ay kusoo iloobeen qolka aabaheed jiifo.

Markii ay qolka aayar usoo gashay ayay eegtay aabaheed. Wuu hurdaa. Wuu neeftuurayaa. Neeftiisu caadi maaha, si boobsiis ah ayuu u neefsanayaa. Wejigiisa ayay gacanta saartay. Wuu kulul yahay. Dhidid ayay dareentay gacanteeda soo raacay. Iyadoo weli dul taagan aabaheed ayay maqashay hooyadeed oo u qeylinaysa *"aaway saliidi aan kuu diray?"*

Jeeg ay sonkor ku jirtay ayay soo daftay.

Markay u keentay adeegi hooyadeed, ayay mar labaad qolki kasoo baxday. Waxay iska furtay ilinkii weynaa ee aqalkooda laga soo galijirey. Waxay u carartay banaanka. Odey Xuud oo qolkiisa ku jira ayaa wuxuu arkay gabadha arooryadaan roobka da'aya sii ordeysa. Madaxa ayuu ruxay. Dumarku roobka ma dhibsadaan ayuu isku sheegay. Waxay martay luuqi u dhaxeeyey guryaha aay Faay iyo eedo

Sareedo. Waxay ogeyd markii waddadaas la maro inay ku taalo balli geedo waaweyn ka ag baxaan.

Wey sii socotay. Buur gaaban ayay kortay oo ka degtay. Socodkeedu ma ordeyso balse rucleysna ka dheer. Balligi ayay timid. Geed weyn ayay roobki ka dugsatay. Cabsi ayaa ku jirta. Ma Qumayaan ahay? Ayay isweydiinaysaa. “Ma jin baa wax ii sheega? Aabahay oo xabaalo loo sii wado ayaan habeenki arbacaad ku riyooday, arooryadii jimcaadna waa lagu soo booday!

Maxaan samayn doonaa aabo la’aan. Aabaheed aad ayay u jecleyd Guduudo. Ilaa yaraanteedii markay cidlooto isagaa wehel u ahaa, markay xanuunsato isagay hoosta ka gali jirtey, markay ooyso isagay dhabtisa ku oohin bogan jirtey. Xataa markii ay weynaatay wuxuu ahaa mid la jooga oo ka warqaba baahideeda.

Gabdhaha Doogleey waxay ku ximin jireen Guduudo inay lahayd aabe geesi ah oo aanan reerkiisa dayacin. Aaboyaal badan waxay tuulada uga guureen iyagoo ku marmarsiyoonaya inay magalada shaqo u aadeen oo ay reerka u maqan

www.bilehashi.se

yihiin. Qaarna sidey u baxeen reerka uma aysan soo noqon oo magaalada ayay reero kale ku samaysteen. Wax masruuf ama marasho ahna uma ay soo dhiibaan xaasaskoodii iyo carruurtoodii ay ka tageen.

Aabe Abiikar wuu ka duwanaa aabayaashaas. Subixii ayuu magaalada u shaqo tagi jirey, wixii uusoo xoogsado wuxuu u keeni jirey reerkiisa, isagana wuxuu usoo hoyan jirey xaaskiisa iyo carruurtiisa. Wuu ka warqabi jirey carruurtiisa kii aradan, kii ay kaneeco cunto, kii baahi kala qaba.

Maxaan samayn doonaa aabo la'aan? Ayay isweydiisay iyadoo Geedki weynaa hoos fadhisa.

Roobki socday wuu sii feerayaa. Waagu-na wuu sii baryi rabaa. Caadki badnaa ee cirka ayaa kala dilaacay, waxaa dhulki soo gaaray ifkii qoraxda. Ma kulula weli qoraxdu balse ifkeedu wuu buuxay. Ifka qoraxdu wuxuu ku dhacayay biyaha fadhiya balliga ay Guduudo hor fadhiso.

Doog iyo cagaar badan ayaa mel walba ka uga muuqday. Waxaa lagu jirey

dhamaadkii xilliyada roobabka deyrta.

Yaa na masruufi doonta hadii aabe dhinto?

Timoweyne haduu isoo doonto tolow yaa i bixin doona? Timoweyne markey soo xasuusatay ayay laabta ka xanxantootay oo hoos iskula qoqoshay.

Waxay eegtay cirka oo caadku sii kala dilaacayo ifka qoraxduna sii xoogeysanyo.
Goormuu soo noqon doonaa Timoweyne? Ayay is weydiisay. Labo goor ayay kulmeen. Mar ay indhahoodu isku dhaceen iyo mar uu maalin jidka u istaagay oo u magaceeda weydiiyey. Mar sadexaad ma uusan soo noqon!
Mise wey ishdhaafeen oo isaguba marar badan ayuu ceelka yimid oo soo raadiyey balse markuu Guduudo waayay ayuu iska qumay isagoo niyadjabsan?

Iyadoo Timoweyne ka fekereysa ayay soo xasuusatay inay reerka kasoo baxday quraacdii oo la diyaarinayo. Wey isku naxday. fadhigi ayay ka booday. Salki ayay gacmaha marisay. Carradi bay iska daadisay.

www.bilehashi.se

Waxay ogeyd in la tabi doono!

Halki ay ka timid ayay usoo oroday. Iyada oo sidii tuugii taagtaagsanaysa ayay gurigi soo gashay. Waxaa u muuqday aabaheed oo lebisanaya.

“Alxamdulilaah!” Ayay ilaah hoosta uga shukrisay. “*aabe see noqotay?*” ayay weydiisay iyadoo u eegeysa sidii inuu xabaalihi ka soo noqday.

“*waan fiicanahay aabe alxamdulilah*” ayuu u jawaabay isagoo suunki surweelka sii xiranaya. Boorsadiisi haraga ka samaysneyd ayuu kadibna gacanta ku dhigay.

*“haye hee aabe, allaha ku nabad keeno”* ayay usii duceysay isagoo sii baxaya. Wey sii eegtay intuu sii socdo. Surweelkiisa inuu lugta ka jeexan yahay ayay aragtay. Shaarka inuu duug yahay wey ogeyd.

Waa dhar ay taqaano oo ay toshay marar badan markay aabaheed ka dilaaceen. Cimaamad guduudan ayaa garabka usaaran gacantana wuxuu ku wataa boorsadii ay ugu jireen raashinki uu ma-

linkaas ku qadayn lahaa.

Wey sii eegtay isagoo sii socda. Lug waxay kula jirtaa guriga lugna dibeda ayay u taala intey sii eegeyso aabaheed oo shaqo usii socda. Ma buurna mana dhuubna, waa nin gaaban oo timo badan aan madaxa ku lahayn, markay qoraxdu kululaato wuxuu madaxa saartaa cimaamada uu garabka ku wato. Ma lutiyo lugna ma la'a saas oo ay tahay wuxuu ugu muuqday inuu gees gees jirkiisu u weecanayo sidi inay dabayshu wado.

Waddadii tuulada ka baxaysay intuu sii hayaa. Guriga hortiisa ayay taagan tahay oo ay ka eegeysaa. Muuqaalkiisu markuu sii fogaadaba wuu sii yaraanayay, ilaa u markii danbe ka mirqay.

"Ilaahow ku nabad keen" ayay uurka uga dueceysay.

"Waxay ahayd riyo xun oo uu sheydaanku i tusay" ayay isku sheegtay. Alxamdulilaah haduu isagoo lugihiisa ku socda uu shaqo aaday. Ilaahow qumayo ha iga dhigin.

§



www.bilehashi.se

## 3.

Waxaad moodey inuu iftiinka dayaxu habeenkaas gaaray heerkii uu ugu if badnaa. Cirbad dhulka taala ishu way arki kartay hadii ay ishu usii fiirsato.

Guduudo iyo Arliyo oo dhuumad ah ayaa aqalkooda kasoo baxay. Salaadi cisho mar horaa la tukaday. Waa xilli dadku badankiisu uu seexday. Iyagoo sidii tuugii taagtaagsanaya ayay gurigoodii kasoo baxeen. Iyagoo aanan fileynin ayay maqleen in Aay Faay raadiyaheedu shidan yahay. Nin iyo naag ayaa si darandoori ah iskugu heesaya.

" *Hobeey caraf iyo udgoon badaneey, Ha igu daahinee durbo soo jar!*" Ayuu ninku

lahaa.
”*Hobeey cuud iyo caraf badanoow, ha i diidinee i daadihiyee!*” Ayay iyaduna ugu heesaysay wiilka.

Qosol dhoocileed ayay qosleen markay maqleen heesta Faay caawa u shidan.

Waxaa la isku xaman jirey Odey Xuud iyo aay Faay inay dadka iskugu jecel yihiin habeenkii, maalintiina dad ay iyagu iskugu nebaayeen.

Qoraxdu markay soo baxdo ayuu Odey Xuud ku eedeyn jirey aay Faay diiqeeda in dadka ka seexan waayeen xalay.

Markay dhowr ereyoo qalafsan is dhaafsadaanna ayay iyadana derbiga uga soo tuuri jirtey wixi ay gacanta markaas ku heyso. Kal, mooye, digsi ama dhagax. Markaasuu odey Xuud meesha iskaga tagi jirey markii la isku soo baxo.

Sidaas oo ay tahay hadii agtiisa lagu xanto aay Faay iyadoo maqan wuu difaaci jirey.

Marar qaar waxay u dirsanjirtey inuu usoo kaarikeeyo battariga gaariga oo ay

www.bilehashi.se

raadiyaha ku dhagaysato. Waxaa Faay u yaalay raadiyo duug ah oo codkiisu aad u liito, mararka qaar guuxa raadiyaha ayaa ka dheeraa heesta shidan.

Afar digaag ah iyo labqatan ukun ayay kusoo bedelatay raadiyaha sidey deriska u sheegtay.

Markuu battarigu ka dhamaado waxay ka soo kaarikeyn jirtey Xamar.

Marmar maalin dhan ayaa aay Faay la weyn jirey oo dadku waxay ku tuhmi jireen inay batarigeeda soo buuxsanayso.

- Maalin dhan ayaa magaalada loo socdaa! Ayay Guduudo maalin u sheegtay.

Galin sii socod ah iyo galin soo socod ah ayaa Magaalada loo socdaa. Ayay Aay Faay ka maqashay. Balse waxay kaloo hooyadeed ka maqashay inay aay Faay aad u culus tahay oo hilibka badan ay la socon la dahay sidaas darteedna ay macquul tahay meel saacado loo socdo inay iyada labo galinu socoto.

Guduudo mar kay soo xasuusato Aay

Faay iyo cayilkeeda hoosta ayay ka qosli jirtey. Waxay xasuusataa habeen ay iyada iyo Arliyo is gogaalaysanayeen ayay waxay is weydiiyeen. ”Dadka nool iyo kuwa dhintay yaa badan” Arliyo oo jawaabtay ayaa waxay tiri hadii inta jiifta lagu xisaabiyo kuwa dhintay kuwa dhintay ayaa badan.
”Habeenki iyo maalinti yaa dheer” ayay iyadana weydiisay. Guduudo ayaa ku tiri midkii qorax dhaca iyo qorax soo baxa lagu xisaabibo ayaa dheer.

Kadib ayay Arliyo oo qosleysa tiri ”Aay faay barideeda iyo naasaheeda yaa weyn” Qosol ayay la dhacday Guduudo. Kadibna intey is qabatay ayay Arliyo, walaasheed ka yar edbisay. Ma fiicna in dadka wax xun laga sheego. Waa danbi ayay bartay.

Aay Faay habeenkaas waxaa u shidnaa hees. Keli inay tahay iyo inuu Odey Xuud wehliyo ma aysan kala hubin. Guduudo iyo Arliyo iyagoo gaatin ah ayay aqalka Faay dhinac mareen, Sareedo iyo carruurteedii oo hurda ayay sii dhaafeen. Keynti Balligi ka danbeysay markay dhaafeen ayay meel fog ka maqleen san-

www.bilehashi.se

qarta cayaarta is qabsatay. Sacabka la isla helay iyo durbaanka ayaa dhagahoodii soo gaaray.

Waxay caawa dhalinta beesha degen ku ballansanaayeen cayaar. Waxay kasoo kala guudeen tuulooyinka dhow dhow iyo kuwo dhaadheerba.

Guduudo waxay soo sasabatay Arliyo si hadii ay u fashilanto aan keligeed loo canaanan , loogana shakinin inay nin la baxday.

"*Ha i diidin, hana daahin , kaalay daadah dibeda soo baro!*"

Waxay soo dhex jeexeen Keymo iyo harro biyo fadhiyaan. Jabaqda cayaarta moogiyee waxkaloo socda maleh. Leydh xaadqaad ah oo kuleyl iyo qabow u dhaxeysa ayaa dhacaysa.
Guduudo wey jilbeysneyd. Wejigeeday ka muuqatay inay dherereyso inay cayaarta boodo oo wiilashu sacabka u tumaan.

Bishu waa caddahay, wareegeedu wuu muuqdaa. Waxaad moodaa nal weyn oo cirka kasoo raaraca. Jabaqda cayayaanka ayay maqlayeen intey cowska kusii ta-

laabsanayaan.
Arliyo ma rabin inay goobta cayaarta tagto. Ma jecleyn dadka badan. Iskaba daa raga badan oo cayaarta imanayee. Guduudo ayaa dhowr mar uga sheekeysay. Caawana kasoo dhaadhicisay inay indhaheeda kusoo aragto. Iyadoo cabsi badan qabta ayay soo raacday.

Markay usoo dhawaadeen goobtii cayaarta ayay Arliyo damacday inay dib u gurato oo gurigi u cararto. Guduudo ayaa gacanti qabatay. ”Naa maxaad ka baqaysaa, aniga sow kulama socdi?” Guduudo oo garabka heysata ayaa Arliyo goobti keentay. Hadii ay gacanta iyadoo heysa keeni lahayd waxay labadooduba ku ahaan laheyd ceeb.

Markiiba hablo reer Doogleey ah ayay isi salaameen.
Eedo Sareedo curradeedi ayaa dhexda boodeysay. Wiil ay Arliyo garatay inuu dhalay nin danbiilaha tola ayaa la boodayay. Wejigiisa dhowr mar ayay aragtay laakin Arliyo ma aqoon magaciisa. Waxay ogeyd oo kaliya inay tuulada barigeeda reerkiisu deganaayeen.

Waxaa iskugu yimid dhalinyaro calaf

www.bilehashi.se

doon ah jirkooduna tamar badan ka buuxdo. Wiilal doobab ah iyo gabdho baaluqay dabka isku shitay habeenkaan, dabadeedna jaanta isla helayay.

Arliyo dhegaha ayay ka maqli jirtey balse caawa ayaa ugu horeysa wiilal iyo gabdho baaluqay oo isla boodaya.

Ma aha inay wiilasha la yaabanayd, oo wiilasha qaar waxay ku arki jirtey ceelka. Laakin markaas waxaa wehliya carruur ama ciroole goob joog ah. Hadii labadaasu joogina waxaa wehlin jirey xoolo ceelka la keenay. Caawase waa doob miiran goobtu.

Guduudo goobta caan bey ka ahayd.

Dhalintii baa u soo kala orday markay timid oo salaamay. Wiilal iyo gabdho intaba. Markiiba cayaarti bey booday!

Sacabki baa lagu deeqay wixii meesha fadhiyey. Guduudo wey ogeyd hadii ay boodo in wiilashu iyada u baratamayaan kii jaanta la qaada.

Inay qurux badan tahay ma aysan mooganayn! Jir iyo joogba rag badan baa u

jariiricoon jirey. Wey ogeyd!

Markey boodo afar ama shan wiil baa isla soo boodi jirey mar si uu midkood u hanto. Aad inay u qurxoon tahay wiilashu wey ogaayeen, dhiigeeda furan dhererkeeda iyo furfurnaanta dabciga waxaa u raacay dhabar adeyga iyo howlkarnimo ay tuulada caanka uga ahayd. Iyadaa gurigooda hooyo ka ahayd. Dadku wey ogaayeen inay hooyo Luul beerta u badneyd oo ay carruurta iyo aqalkaba Guduudo kusoo dhaafi jirtey. Wiil walbaa wuxuu rabay inuu Guduudo xilladiisa noqoto.

Guduudo cayaarti bay booday. Wiil macawis iyo go cad xiran baa kasoo daba boodey. Ushi uu watay ayuu kor u wirfiyey jaantina sacabka la helay. Intuu is wareejiyey ayuu jaanti sacabki misna lasoo gooyay. Shab!

Labo kalaa isla soo booday oo mar isku dhici gaaray. Doobabkii ayay dhexda u gashay. Sacabki baa isqabsaday. Dabki baa holcay. Dayaxii baa iftiin ku deeqay inti boodey iyo intii fiirsanaysayba.

www.bilehashi.se

- …soo soco simaneey….
- …ha i seegin suluboow!..

sacabka sacabka sacabka…..
Arliyo sacabkeedu wuu yaraa, waxayna ku jirtay dhowrkii gabdhood oo fara ku tiriska ahaa ee habeenkaas cayaarta ka tagay iyaga oo aanan boodin.

Markay usoo dhow yihiin gurigooda labadooduba wadnahaa ayaa cabsi la gariirayay. Aabe oo soo jeeda amaan u tagnaa ayay islahaayeen. Saanta aayar ayay u qaadayeen, sanqarta ayay iska ilaalinayeen. Markay so dhawaadeen dhaxan yar baa jirtey iyo dhedo dhulku u la dhegay. Shimbiro arooryaad ayaa korkooda ka qeylinayay markay soo galeen.

Aayar ayay darmahoodii usoo jiifteen. Iyagoo aanan isla hadlin ayay dhulka dhinaca dhigteen. Wey sii kala jeesteen. Diiqii Aay Faay ayaa qeyliyey.

Waagu markuu baryay waxay ku kaceen Afrax iyo Xirsi oo dul taagan. “Hooyo sookaca ay idin tiri” Arliyo suuliga ayay u oroday. Guduudo waxay soo aadaydaashkii oo ay hooyadeed quraacda ku diyaarin jirtey.

Hooyo ma joogto. Burjikadi wey shidan tahay. Afrax ayay weydiisay “aaway hooyo?”

Qolka ay waalidkood jiiftaan ayuu farta ugu fiiqay.

Afrax ma hadal badnayn. Sagaal jir ayuu ahaa balse wakhti ayay ku qaadan jirtey inuu hadlo. Qofka aan Afrax aqoon wuxuu is dhihi lahaa hadalkaa kasoo daahay.

Qolka farta loogu fiiqay ayaa Guduudo looga dhawaaqay.

“Maxay taahay saacada la hurdo?, kac oo quraacda diyaari” ayay maqashay hooyadeed oo qolka amar kasoo siinaysa.

Qolki codka ka yimid ayay soo fiirisay. Waxay aragtay aabaheed oo jiifa, iyo hooyadeed oo babis la dhinac fadhisa.

“Hooyo aabe suu yahay”

- Wuu fiicnaanaa! Ayay niyada u deji istiri.

www.bilehashi.se

Guduudo oo uusan hadalkaasu marin ayaa soo ag fadhiisatay aabaheed oo indhaha isku haya. Madaxiisa ayay gacanta saartay. Waa dab. Xabadkiisa waxaad moodaa in hoosta laga soo buufinayo, kor iyo hoos ayay sambabihiisu u boodboodayeen. Isha ayay ku dhufatay baaf ag yaalay oo uu matag ka buuxo.

“Hooyo cisbitaal ma geynaa?”

Madaxa ayay ruxday. “Wuu fiicnaanaa insha allah”.

Galabtii weli ma ka soo fiicnaanin.

Maalintaas ma shaqo tagin. Saqdhexe ayaa lagu soo booday. Dhowr mar ayuu suuliga u cararay reerkoo jiifa. Luul markay marki danbe kusoo kacday waxay aragtay in qandho badan u la qarqaryoonayo jirkiisu. Koob biyo ah oo qaboow ayay ashuunka uga soo shubtay.

Go weyn ayay saartay. Markuu dhididayna go’i ayay ka qaaday oo babis ayay la ag fadhiistaay ilaa waagu uga baryay.

“Intee jirteen xalay?”

Luul oo aanan su'aashaas hooyadeed ka fileynin markaas ayaa su'aal kale ku celisay hooyadeed.

- Maxaad ka wadaa intee jirteen" waan jiifnay.

Luul wey iska aamustay.

Ma inaysan awoodin muranka ayay la aamustay mise jawaabta ayay ku qanacday. Guduudo ma kala hubin ee burjikadi ayay u carartay.

Shalay Luul xilli danbe ayay beerta ka soo hoyatay. Waxaa lagu jirey xilligii beerta la fali jirey oo ay shaqadu cusleyd, badneydna.

Markii ay timid waxaa dhabarka uga is-istaagay Afrax oo sagaal jir ahaa. Kadib Inyar markii ay derinta ku nasatay ayay saxan digir ah wiilasheeda yaryar la cuntay. Arliyo ayaa u adeegeysa.

- Caanihi aaway hee?
Caanihi ayay u keentay sadex galaas. Luul iyo labadeeda wiil oo derinta fadhiya.
- Sonkor ma laha miyaa digirta?

www.bilehashi.se

- Haa hooyo sonkorti wey dhamaatay.

Luul sida dhakhsaha badan oo ay sonkorta u dhmaatay ayay ka welweshay. Balse ma aysan weydiinin Arliyo. Cambuulada inay saliida ku yar tahay oo ay qalalan tahay xataa wey dareentay. Ma weydiinin inay saliidi wax ka hareen iyo inkale.

Habeenkas xilligii la seexan jirey ka hor ayay soo seexatay dhabarka oo xanuunaya. Saqdhexe markuu xanuun Abiikar kusoo booday ayay soo toostay iyadoo aanan hurdo bogan.

Isaga ayay habeenkaas barkiis dul fadhisay indhaha oo hurdo la luloonaya. Beerti beri subax inay u kalahdo ayaa laga rabaa. Waxay ka welwelsanayd xanuunki seygeeda isbuuci hore ka fuqay oo soo laba kacleeyey.

Ma la ileystay ninkeeda? Ma sun buu magaalda kasoo cunay?

Madaxeedu wuu buuxay. Ma awoodin inay la muranto Guduudo iyo halkey xalay u baxeen. Waxay saqdhexe Luul keligeed is weydiinaysay waxa ay samayn doonto hadii seygeeda ajashiisa ay gasho

caawa? Yaa la korinaya carruurta?

Arliyo oo suuligi kasoo baxday ayaa qolki iyadana timid.

”Hooyo Aabe xanuunkii maa kusoo noqday?”

Wuu fiicnaan doonaa insha allah! Ayay gabadheedi kalena u sheegtay.

Maxaan beenta ugu sheegayaa ayay isweydiisay hadana. Maan runta u sheego waa gashaanti waxgarad ahee. Maan u sheego inaan la welwelsanahay inay ajashiisi dhow dahay. Inaan la welwelsanahay sidaan aabe iyo hooyo idiinkugu wada noqon lahaa. Sidaan uga welwelsanahay in guriga nalaku soo jabsado markay tuugadu ogaato inay guriga ku nool yihiin labo gabdhodoo gashaantiyo ahoo rag difaaca lahayn.

Habeenkii lagu soo booday habeenkii xigay weli wuu ildarnaa. Ma uusan kasii darin, mana uusan kasoo fiicnaanin.
Miyirkiisu ma joogin inta badan. Qandho miyirki ka qaaday ayaa heysay. Jirkiisu

www.bilehashi.se

wuu qarqarayay. Waxba ma uusan cunin ilaa shalay. Mishaariyo ay Guduudo afka ugu shub istiri, markay qaadadii sadex-aad usii wado ayuu matag lasoo fadhi-istay.

Aay Faay oo aanan maanta arag Luul oo beerta usii kalahaysa iyo Abiikar oo sii baxaya midna ayaa albaabka kusoo ga-raacday fiidkii xigay.

Aay Faay waxaa lagu xaman jirey inay la socoto wax walboo Doogleey ka dha-ca. Dadka mid mid ayay u kala taqaanay, reeraha isku kacsan iyo kuwa degen int-aba xoog ogaal ayay u ahayd. Qofki la ga-ranwaayo iyadaa magaciisa ama maga-ceeda la weydiin jirey.

”Hoodi hoodi maxaa la sheegay” ayay al-baabki reerka iska soo furtay oo daashki soo istaagtay.

Luul ayaa daashka uga hortimid. Waxay uga sheegatay in seygeedi Abiikar nabar kusoo booday hadana.

“Waa il , waa la ileystay ninkaaga” ayay Aay Faay cod kalsooni buuxda kujrito ugu sheegtay nabar ka haya Luul nin-

keeda. Waxayna ku boorisay inay Sheekh Shoobe ula cararto. Dad badan oo sidaan oo kale loogu qabtay ayuu isha ka saaray ayay u sheegtay.
Insha allah wuu fiicnaan doona!

Aay Faay hadii ay ogaatay xaalada Abiikar Doogleeyna wey ogaatay in Abiikar uu nabar la jiifo. Salaadii cisho markii laga soo baxay waxaa isna reerka soo booqday Odey Xuud.
- Siduu xaalkiisu yahay Abiikar. ayuu si taxadar lehu weydiiyey Luul.
- Walahi waa la hayaa!
- Maxaad yeeli doontaa?
- Sheekh Shoobe inaan u geeyo ayay Faay igula talisay.
- Aay Faay ...ayuu yiri isagoo qoslaya. Aay Faay qof la dhagaysto warkeeda maahee Abiikar magalaada ha loo qaado si uu dhakhtar usoo wiisiteeyo.

Wuxuu u sheegay inay magaalada joogaan dhakhaatiir dadka tabaalka daran kaalmeysa oo dawo bilaash ah qeybiya. Hadii aan qaadeyno isoo wargeliya! Ayuu Isna reerki uga tagay.

”Nin bukaa boqol u tali”

www.bilehashi.se

§

## 4.

Guduudo welwelka haya ruux ay la qaybsado ayay u baahneyd. Saa oo ay tahay cidna uma aysan sheegin wixi riyada lagu tusay. Hadii ay dadku maqlaan sow lama oranayo waa Qumayo. Sow lama takoori doono.

Markay sirti heyn kari weysay ayay maalintii danbe Arliyo ku aamintay. Si taxadar iyo feejignaan leh ayay ugu sheegtay.

Labadooda kaliya ayaa guriga joogay. Waxay ahayd goor casar ah. Afrax iyo Xirsi waxay jireen dibeda oo waxay la soo cayaarayeen carruurta Sareedo. Aabe

qolkiisa ayuu jiifay. Wey ogeyd inuusan lahayn awood uu keligiis kusoo istaago oo uu warkooda ku dhagaysto.

Intaba markay hubsatay ayay Arliyo u sheegtay.

Arliyo waxay dul fadhisay Guduudo. Guduudona waxay hoos fadhisay Arliyo jilbaheeda dhexdooda. Guduudo ayaa timaha loo tidcayay.
Markii ay timaha isku tidcayaan aad ayay labadoodduba u jeclaayeen. Wey qosli jireen, wey xifaaltami jireen, sirtana isku sheegi jireen.

Arliyo oo yaaban ayaa Guduudo weydiisay wuxuu maalmahaan aamuskeedu u batay. Ma timoweyne ayaa ku ciilay? Ayay weydiisay.

Guduudo oo fursad heshay, wixii uurkeeda kujirayna ku weynaadeen ayaa intey kor usoo eegtay Arliyo hoos hoos ugu sheegtay ”Qumayo ayaan ahay” jin ayaa ila hadla.

Qosol ilaa guriga Aay Faay laga maqlo ayay Arliyo ku qososhay Guduudo warkeeda. ”Weyba kaa muuqata” ayay ugu

www.bilehashi.se

jawaabtay. Iyadoo weli ku qosleysa. “ind-hahaaga fiiri” hehehe

Markii ay aragtay inaysan Guduudo maad u arag warka ay sheegtay ayay Ar-liyo isku yara naxday. ”Ma kaa daacad baa? ”
Waxay uga warrantay riyadii oo kaamil ah. Aabe oo xabaalaha loo sii wado, ayaa la itusay ayay tiri. Labo maalin ka hor maalintii lagu soo booday. Ragga nax-ashta wada ma aysan ii wada muuqan laakin waxaan ka gartay Odey Xuud. Ayay usii sharaxday. Naxashta markii dhulka la dhigay intaan iilka la dhigin waxaa ii muuqday ayay tiri jirkiisi oo karfan ku dadan tahay.

Arliyo warka wey dhuuxaysaa.

Habeenkii arbacada ayaan riyooday sub-ixii jimcaadna waa lagu soo booday aabe! Ayay u sheegtay. Sow Qumayo ma ihi?

Hadalka waxyar ayay la daahday Arliyo. Kadibna iyadoo wejiga Guduudo eegeysa ayay u jawaabtay “Maya, ma u malynayo inaad Qumayo tahay”

“Imisa ayaa kasoo wareegtay riyada?”

Arliyo inkastoo ay iyada ka da'yarayd Guduudo waxay u hadli jirtey sidi inay Guduudo ka da' weyn tahay. Wey ka degenayd. Guduudo wixii maskaxdeeda kusoo dhaca markiiba afka ayaa dafi jirey.

Bil ka hor ayaad riyootay. Aabana weli ma dhiman. Ayay Arliyo si degen ugu sheegtay Guduudo.

- Waa la riyoon karaa waa caadi. ayay ku tiri iyadoo garabka ka dharbaaxaysa, indhaheedana eegeysa. Geeridana waa xaq. Adiga waad dhimanee, aniga waan dhimanaa, aabe iyo hooyo, Afrax iyo Xirsi, Aay Faay iyo Odey Xuud, eedo Sareedo iyo ilmaheedoo dhan. Kuli waan dhimanaynaa!

"Maxaa aniga la ii tusay hadaba?" ayay Guduudo oo aad moodo inay u calaacalayso walaasheed ka yar ku tiri Arliyo. "Waa inaan Qumayo ahay oo aan is ogeyn"

"Qumayo ma tihid ee cowdubileeyso bisinkee" ayay Arliyo ka codsatay walaasheed inay alle magangasho. Niyada kheyr

www.bilehashi.se

u sheeg. Aabena wuu ka kacayaa tan insha allah.
Markii ay maqashay ereyda dhiirigalinta ah ee ”aabe wuu ka kacayaa tan insha allah” ayay Guduudo weydiisay in aabe loo geynaayo Sheekh Shoobe? ”Hooyo maxay tiri?”
Hooyo ayaan weydiinaynaa markay timaado. Ayay Arliyo oo leynkii ugu danbeeyey timaha Guduudo dabaysa usheegtay Guduudo oo intii hore dhaanta.

Hooyo Luul Meelo badan ayay uga furneyd. Meelo aysan iyagu ogeyn. Bakaarti raashinki guriga u yaalay wey sii dhamaanaayeen. Sonkor uma taalo, saliidi weyka dhamaatay, Bariis qalalan iyo khudaar ayaa maalmahan reerku quudanayeen. Shaah bilaa sokor ah ayaa lagu casariyeyn jirey. canbuulo bilaa sonkor iyo saliid ah ayay ku casheyn jireen.

Aabahood guriguu jiifaa.

Beerta ay Luul falan jirtey waxay ahayd labo xilli, xilli la beero oo howshu ay badan tahay anfacuna yar yahay iyo xilli ay beertu soo go’do oo nolosha baahideeda la haqabtiri karo. Guriga waxaa laga cuni jirey markaas bariis iyo hilib, timir

iyo buskud, bijiye iyo basbaas, khudaar lagu faakiheysto.

Waxaa xilligan lagu jirey xilliga beerta la fali jirey. Bakaarti raashinka u yaala wey sii dhamaanaysay. Xilliga ay beerta soo go'i doonto wey fogeyd. Aabahoodna xanuun buu la jiifaa oo siduu xaalkiisa noqon doono lama oga.

Wejigiisi wuu is bedelay, tuunjiga ayaa lala hoos taagan yahay, wixii uu afka galiyo hore ayuu kasoo matagayaa. Jirkiisi wuxuu noqday laf iyo maqaar. Hooyadood ma heyso lacag lagu geeyo sheikh Shoobe.

"Sheekha lacag badan buu rabaa" ayay u sheegtay markay fiidkii Arliyo weydiisay.

Codkeedi hooyo sideedi maaha. Waayahaan way is bedeshay. Hadal kulul iyo Xanaaq ayaa ka soo haray. Fiidki ayay guriga ku kacdaa oo amar ku bixisaa in qolkeeda lasoo nadiifiyo inta ay carruurta cashada siinayso. Qofki kusoo warceliyana waxay kusoo tuurtaa kab, kal iyo digsi wixii ag yaala.
Xataa mar waxay gabdhuhu arkeen iya-

www.bilehashi.se

doo canaananaysa aabahood oo dhulka yaala. Ma intuu fiyoobaa oo kaliya ayay jecleyd? Mise kurbada haysa ayaa qof kale u bedelay?

Waxay dhowr goor arkeen iyadoo markay istaagto wareereysa. Waxay arkeen iyadoo derbi intey qabsato matagaysa. Waxaa hayay walbahaar kurbeynayay. Xaalada reerka way ogaayeen sidey tahay.

Aay Faay oo uu warku gaaray ayaa xoogaa yar oo lacag ah u keentay. Laakiin ma ahayn lacag ku filan sheikh Shoobe. Sidaa darteed ayay Guduudo bilowday inay ka fekerto sidii ay lacag ku heli lahayd. Maxaan heystaa oo aan iibiyaa? Maxaan iibiyaa?

“Alla xumaa markaad fakhri tahay”

Odey Xuud oo maqlay inay Aay Faay reerka lacag siisay ayaa isna isxilqaamay. Reerihii deriska ahaa ayuu uga soo qaaraamay. Dabcan isagoo aanan u sheegin reer Abiikar ayuu xaafadihii galay. Wuxuu isla soo helay lacag uu isyiri sheekhu wuu ku qanci karaa.

Subixi danbe ayaa Abiikar gaari dameer

la saaray oo Sheekh Shooble loo qaaday. Waxaa raacay Luul iyo Guduudo.

Sheekha wuxuu ku noolaa tuulo galbeedka kaga aadan Doogleey oo dameerku uu u socdo ugu yaraan nus galin. Intey waddada sii socdeen xanuun badan ayuu Abiikar ka sheeganayay laakiin rajadiisu wey fiicneyd.

Markay xerada sheekha soo gaareen waxaa albaabka uga hor yimid labo wiil oo xer ah. Albaabkii ayay dameerkii u balaqeen. Bukanki ayay ku tufeen.

Dad badan ayaa xerada sheekha joogay. Carruur ayaa isbursanayay. Dumar dhowr ah ayaa geed harkiis taagnaa. Labo ayaa badar tumayay oo kasha mooyaha la helayay iyagoo heesaya.

Bukaanki markii dameerki laga soo dejiyey waxaa la dhigay meel ay xertu u tilmaameen in la dhigo Abiikar.

Ammin yar kadib waxaa la furay albaab.

Waxaa kasoo baxay labo nin oo dabqaad qiiqaya wata. Uunsi iyo foox ayay meeshi

www.bilehashi.se

isqabsatay. Labada nin wax bay akhrinayaan aan faseex ahayn.
Bukaanki ayay ag dhigeen labo dabqaad oo qiiqaya. Dabqaad madaxa bukaanka ayay dhigeen. Dabqaadna lugaha bukaanka ayay ag dhigeen.
Bukaanka labadiisa dhinac ee bidix iyo midig ayay iyaguna kala istaageen.

Labadii nin waxaa kusoo biiray oo dhinacooda soo saftay rag iyo dumar durbaano wata.
Durbaanki bey tumeen. Wax aysan Luul iyo Gabadheedu weligood maqlin ayay ku heeseen. Gabara ayaa Luul danbiil lasoo hor istagtay durbaanki oo dhegaha xanuunjinaya.
Lacag wixi ay waday ayay danbiishi ugu tuurtay. Qiiqi fooxa iyo durbaanki ayaa cirka isku shareeray.

”Malaha waa heesta jinka” ayay niyada iska yiraahdeen.

Waxaa kadib albaabkii ay labada nin kasoo baxeen kasoo baxay nin ay sheekh Shoobe ku qiyaaseen.Tusbax weyn ayuu gacanta midig ku wataa. Shaal weyn ayaa garbaha u saaran, gar weyn oo cad ayaa wejigiisa kasoo laalaada.

Durbaankii baaa aamusay.

Sheekhii ayaa bukaanki soo dul istaagay. Sidii qof ganuunacaya ayuu wax akhrinayaa. Lama maqlo wuxuu akhrinayo.

Wejigiisa ayay eegeen bal inuu sheekhu arko jinka galay Abiikar. Sheekhu wuxuu cirka u wirfinayaa gacmaha, bidix iyo midig, kor iyo hoos. Wixii uu hoosta u akhrinayay markii hore ayuu si boobsiis ah u akhriyey markaan.

Luul iyo Gaduudo sheeka ayay eegayaan. Indho waaweyn ayay ku eegayaan.Fajac iyo feejignaan ayay u eegayaan.

Sheekha wejigiisu wuu isbedelay. Gacmihi ayuu dejiyey. Sidi inuu wax gaadayo.

Khaakh! Tuff! Candhuuf ayuu wejiga uga tufay Abiikar oo jiifa. Wiilashii durbaanka la dikrinaayay ayuu midkood sheekha usoo dhaweeyey baaquli ay biyo ku jiraan. Tahliil baaquliga ku jirtay ayuu sheekhii soo darsaday oo ku bilbilay bukaanki. Abiikar oo madaxa ayuu leexleexinayaa.

www.bilehashi.se

Wixuu akhrinaayay ayuu sii waday.

- Magaciis bukaanka? Ayuu weydiiyey gabdhaha bukaanka wada.

- Abiikar ayay mar wada yiraaheen Luul iyo Guduudo.

Wixii uu sheekhu akhrinayay ayay ka dhex maqleen magacii aabahood.

Qadar yar kadib ayuu qolkiisi ku laabtay sheeki. Intuusan qolkiisa ku xaroonin ayuu gadaal soo eegay. Gabdhihi waday bukaanka ayuu la hadlay. ”Jin ma aha waxa helay” ayuu yiri.

”Maxaa haya hade sheekhoow haduu-san jin ahayn?”

”Koox jin ah aya iskugu tagtay” ayuu ku yiri.

Sheekhu wuxuu lahaa cod madoow oo xabeeb badan leh, wejigiisu inuu sheyb yahay ayaa ka muuqatay. Koox jin ah ayaa iskugu tagtay ayuu u sheegay waxa haaya Abiikar. Mid mid ayaan u dilay! Ayuu u sheegay Luul. Kii u danbeeyey is-agoo ololaya ayuu cararay!

- Wuu fiicnaan doonaa! Yasir ayuu dareemi doonaa dhawaan, yassir.. Insha allah! Tusbixi ayuu wirfinayaa weli. Ha nasto! Raashin fiicana siiya! Ayuu ku yiri. Kii isagoo ololaya iga baxsaday haduu ku soo noqdo, waxaa suuro gal ah inuu ciidan kale usoo wato ee iila soo noqda bukaanka.
Qolkiisi ayuu sheikh Shoobe ku noqday.

Xerti ayaa durbaanki goobta ka aruursatay oo kala dareeray.

Maalmihii xigay Abiikar wuu soo fadhiistay. Qandhadii weli wey heysaa marmarna wey rideysay balse inay wax badan iska bedeleen ayuu dareemayay.

Xataa matagi badnaa wuu ka yaraaday. Wuxuuna bilaabay inuu sheekeeyo. Waxaa soo booqday Aay Faay iyo Sareedo oo carruurti iskaga soo tagtay goor casar ah. Galabti oo dhan ayuu u sheekeynayay inkastoo awoodiisu weli yarayd.

Maalintii afaraad keligiis ayaa suuliga tagayay.

Maalintii shanaad markii ay matagii iyo

www.bilehashi.se

qandhadhiiba soo laabteen waxaa loo aaneeyey inuusan bukaanku helin nasiinadii u sheekha soo faray. Maadaama deriska soo booqday ay nasiinada u diideen.
Mise jinkii isagoo ololayaya sheekha ka baxsaday ayaa koox kale usoo kaxaystay?

Maalmihi xigay waxaa cadaaday inuusan ku daawoobin tahliishii sheeka. Lacag wixii la haayayna sheekha ayaa loo geeyey.

Odey Xuud oo markii horeba soo jeediyey in dhakhtar loo geeyo Abiikar ayaa saluugay howgalka sheekha. “Khuraafaad waaye !” ayuu yiri waxa uu sheekhu akhriyey. Luul iyo aay Faay ayaa mar qudha afki gacanta saartay. “Sheekha yuusan ku maqlin” ayay kula taliyeen. Oo inkaartiisu yeysan ku qaban adna.

“Haduu sheekhu jinka arko koley ana wuu i maqlay mar hore” ayuu ku yiri. Wey wada qosleen. Qosol gariir.

- Arinkan anigaa galaya! Ayuu ka ballanqaaday Luul oo uu ogaa inay maciin u baahan tahay. ”Waa hadii ay marwo

Luul” ii fasaxdo! Ayuu yiri isagoo ci-maamada madaxa ku saxanaya fadhiga-na kasii istaagaya.

”Dabcan” adba Abiikar waa saaxiibkaa

Markuu Odey albaabka ka baxay ayay Gaduudo tiri ”Odey Xuud waa nin fiican allaha dhowree” warka waxay u waday aay Faay oo ay ogeyd inuu odeygu jecel yahay.

§

www.bilehashi.se

## 5.

Odey Xuud ayaa Abiikar kala soo safray Doogleey. Waxaa wehliyey Guduudo oo lasoo raaciyey aabaheed. Markey magaalada yimaadeen wuxuu Odey Xuud geeyey cisbitaalka taliska Amisom.

Waxaa lagu qaabilaa bukaanka danta yar! Ayuu u sharaxay Luul iyo gabdhaheedaba. Dad badan oo gobolada wadanka kasoo barakacay ayaa meesha lagu dabiibaa.

Odey Xuud si fiican ayuu Xamar u kala

yaqaanay. Xataa mar magaaladaan ayuu ku noolaa markuu wiilka ahaa. Guduudo dhowr mar oo ay hooyadeed khudaarta lasoo qaaday mooyee magaalada wey ku cusbeyd.

Dadku aad bey u badnaayeen markii loo fiiriyo Doogleey. Jawiga aad buu uga gedisnaa Doogleey. Khalqiga iyo gawaarida badan ee is dhex jibaaxaysa waxay daalinayeen madaxa. Dadka magaaladu wey ka socod gaabnaayeen dadka Doogleey. Dhaqankooduna wuu ka duwanaa.

Subixii aroortii markii cisbitaalka la furay waxaa Odey Xuud loo gooyay nambarka koowaad. Abiikar wuxuu ahaa bukaanka subaxaas la qaabilay kan ugu horeeya. Qando sidaas ah ma haynin balse jirkiisii ayaa bararay, indhihiisuna midab kale ayay yeesheen. Daal badan iyo lalabo ayuuna ka sheeganayay.

Marki la qaabilay waxaa la geeyey teendho weyn oo sideed sariirood ay yaalaan.

Odey Xuud banaanka ayaa lagu reebay. Guduudo ayaa teendhadhi la gashay. Dhakhtarkii Ugaandheeska ahaa markuu Abiikar fiiriyey wuxuu markiiba

www.bilehashi.se

kalkaalisada ka dalbay inay faleebo ku xirto, dhiigagna laga qaado.
- Halkee ka timaadeen? ayuu Guduudo weydiiyey.
- Doogleey.
Markuu ogaaday inay meel fog kala timid aabheed ayuu kalkaalisadi ka codsaday inay meeley habeenki bariso u hesho gabadha. Wuxuu ogaa inuusan aabaheed caawa hoyan doonin oo ildaran yahay. “Raashinna siiya gabadha” Ayuu dhakhtarku sii faray kalkaalisadi.

Markii loo turjumay ayay hoosta ka tiri “kan ilaahaa noosoo diray”

Odey Xuud oo ilaah nimcada uga mahdinaya wuxuu u noqday Doogleey. Waxaa la haray abiikar gabadhiisa uu ku curtay.
Maalmo dhowr ah kadib indhihi ayuu kala furay Abiikar. Gacanta ayuu gabdhiisa qabsaday. Isagoo xayinimo dareemay, wejiguna farxadda ka muuqato
“Aabe waan cabsanaayay” ilin ayaa indhihiisa kasoo fakatay. “Inaan idinka dhinto ayaan ka baqayay” waxaan la welwelsanaa hooyadaa iyo markay carruurta keli...

Gacantiisa ayay gacanteeda kor saartay. “aabe waan ku jeclahay” ayay ugu jawaabtay iyadoo ilinta la xarbinaysa inay soo daadato.
Subixii xigay ayuu dhakhtarkii usoo galay kana codsaday inuu iyada si gooni ah ula hadlo.
Qol teendhada ka baxsan oo uu dhiiga dadka uga qaadi jirey ayuu geeyey. Wiil soomaali ah ayaa u kala turjumayay. Wuxuu yiri aabahaa wuu ildaran yahay. Beerka ayaa laga hayaa. Vayrus ayaa ku fiday beerkiisa.

- Vayrus muxuu yahay? Ayay wiilki soomali weydiisay. Ma jinkii isagoo ololaya baxsaday baa? Ayay niyada iska weydiisay inteysan weydiin.

Dhakhtarkii afka gaalo ku hadlayay ayaa u sharaxay howlaha uu beerku qabto. Beerka howlo badan ayuu qabtaa sida inuu jirka wasakhda ka nadiifiyo. Vayrusku wuxuu daciifiyaa shaqada beerka uu qaban lahaa. Taas oo sababaysa in wasakhdii jirka soo gashay uusan jirku kala maarayn karin.

Iyadoo aanan wada fahmin warka wiilka uu u turjumayo balse macnaha guud

www.bilehashi.se

fahantay ayay tiri ”ilaahoow aabahay ii caafi”
Dhakhtarki ugaandhees wuxuu u qoray Guduudo warqad ay ku taalo dawo uu aabaheed u baahan yahay.

”Lacag ma haysto” ayay u sheegtay.

“Waan ka xumahay” ayuu dhakhtarkina u sheegay inuusan taas ka caawin karin. Aduunyadu inay khariban tahay wuu ogaa dhakhtarku. Fakhrigu inuu wax xun yahay wuu ogaa. Muxuuse ka samayn karaa? Maalin walba boqolaal iyada la mid ah ayuu albaabka ka xirtaa. Dad dayacan oo aan dowlad lahayn inay soomaali tahay wuu ogaa. Danyartu inay ugu liidato wuu ogaa. Muxuuse u qaban karaa?

Aaabheed intii hore wuu dhaamaa. Faleebadii lagu suray wuxuu ka helay nafaqadi uu u baahnaa. Sheekh shoobe waatuu lahaa waa in raashin fiican la siiyo! Malaha raashin la’aan ayaa gurigeena ku haysay. Raashin ka fiican bariiskii qalalnaa, galaydii iyo digirtii ayuu helay.

Mise dawo ayay faleebaha ugu dareen. Ma oga! Laakin Guduudo waxay ogeyd

inuu aabaheed wax badan dhaamo sidii uu ahaa markii uu halkan yimid.

Waxay dhowr maalmood gashay magaalada markii ay cisbitaalka kasoo quraacatay. Jidka islaamo fadhiya oo tuugsanaya ayay aragtay. Dhinacoodi ayay iyadana fadhiisatay. Markay aragtay inay dadka magaaladu dad fiican yihiin ayay habeen iyo maalin meel walba dadki gacanta u taagatay. Waxay ugu fiicneyd maalin ay la kulantay dad salaadii jimce soo tukaday oo masaajidka kasoo dareeraya.

Maalintaas waxay saacad gudaheed ku heshay wax aysan helin khamiisti iyo arbacadiiba?.
Nin dadki salaada kasoo baxay ahaa ayaa kuyiri “Gabadhaan saan u qurxan baad tahee maxaad la tuugsanaysa?” isagoo u dhoolacadeynaya. Wuxuu ahaa nin weyn, haduu ugu yaraado aabaheed la fac ah. Laakin aabaheed ka dhaqan, ka cayilan, ka qurxan. Caloooshiisa weyn ayay ka garatay inuu yahay nin dhaqan. Waxay u sheegtay sababta ku kaliftay inay gacanta hoorarsato. Si fiican ayuu u dhagaystay. Markuu gartay gabadha dhibka heysta ayuu jeebka gacanta galiyey oo siiyey kuus lacag ah oo isku

www.bilehashi.se

duuban. “Waxaan kuu rajeynayaa inuu aabahaa ka kaco” ayuu ku yiri isagoo sii galaya gaari miraayadihiisu madow yihiin.
Markii ay isla heshay lacagtii ayay aabaheed u timid. Wejigiisa farxad ayaa ka muuqatay markay ugu bishaaraysay inay u heshay lacagti lagu soo iibin lahaa dawada uu ku bogsan lahaa. Wey dul taagneyd isagoo sariirta jiifa markay warka u sheegeyso. Gacanteeda ayuu soo jiitay ilaa uu wejigeedu wejigiisa u dhawaado. Dhabanka ayuu ka shumiyey. Waan ku duceeyey ayuu ku yiri “Wax dhib ah ilaah kuma tuso, aduun iyo aakhiraba”

Isla casarkaasba waxaa loo tilmaamay suuqa bakaaraha. Markii ay suuqa timid ayay dad weydiisay “dukaanka dawada lagu iibiyo”

Labo gabdhood oo dadka magaalada ah ayay istaajisay oo weydiisay. Gabadhii ayaa ku qoslay su’aasha Guduudo.

Maxaa tiri “dukaanka daawada lagu gado“ Wey qosleen.

Guduudo oo aanan fahmin waxa qosolka iyo maadda ah ayaa gabdhihi eegtay.

Iyada ayay la fac yihiin, midbaa dheer tan kalena Guduudo ayay la dherer ahayd. Lebiskooda waxay hubtay inay dadka magaalada yihiin. Cabaayadaha xabadka u feydan oo qaarka danbe kaliya asturaya iyo ookiyaalaha indhaha ugu daboolan ayay ka garatay.

Warqadii dhakhtarka ayay u dhiibtay. Si aysan qof wax khiyaana ugu moodin.

- Dukaanka daawada lama yiraahdo, waxaa la yiraah “farmashiyaha” ayay bareen. Adiga intee ka imaatay horto? Amisom aaa...markay warqada akhriyeen. Qatar! Hotel Amisom maa degen tahay? Aaway ilaaladaadi?

Guduudo oo aan weli qosolka gabdhah fahmin ayaa waxay u sheegtay inay magaalada ku cusub tahay oo ay tahay reer Doogleey, daawadana aabaheed oo xanuunsan ay u soo doontay.

Wey ka naxeen. Kaftanki ayay joojiyeen.

- Abaayo horta aabahaa allaha caafiyo, warqada aad na tustayna dadka ha tusin! Ayay uga digtay.

www.bilehashi.se

Waxay u sharaxday magaca amisom warqad ay ku qoran tahay qofkii lagu arko in looga shakinayo inuu xiriir la leeyahay ciidan shisheeye. Waxaana jira alshabaab oo aanan weli magaalada ka bixin oo si qarsoodi ah u howlgala. Marka alshabaab yeysan kugu arag warqadaan. Ayay uga digeen inteysan ka tagin.

Farmashiyihii labaad sidii kii koowaad ayuu ugu jawaabay " Dawadan ma hayno, magaaladana lagama helo".

Farmashiyihii sadexaad ayay nasiibsatay. Wuxuu ahaa farmashiye shaqaalihiisu Alshabaab la shaqeeyaan.Waxay ku maaweeliyeen inay dawadi ugu maqan yihiin.
Wey faraxday. Farmashiyihi ayay iska dhex fadhiisatay. Waxay gashay riyo iyo sida uu aabaheed dawada ugu dawoobi doono. Ninki ay warqada u dhiibtayna wuxuu ku maqnaa inuu hoosta ka waco ciidanka sirta ah ee Alshabaab. Taleefan ayuu ugu sheegay inay u timid gabar murtadka la shaqeysa.

Markiiba waxaa yimid wiil alshabaab ka tirsan oo loo soo diray inuu gabadha

khaarajiyo.

Markii loo sheegay inay dawadi aysan heynin ayay farmashiyihi kasoo baxday.

Waxaa kusoo dhacay hadalkii gabdhihii, warqad ay amisom ku shaabadeysan tahay dad ha tusin!
Wiil wejigiisu qalafsan yahay oo iyada soo eegaya ayay aragtay. Bacda adeega oo uu wato ayaa waxaa uga dhex muuqday inuu bastoolad wato.

Alshabaab wey taqaanay. Doogleey ayay joogi jireen. Waxay gudaan iyo waxay galaanba wey ka dheregsanayd.

Markay isku so dhawaadeen ayay ka socod boobsiisay. Gadaal ayay u eegtay. Wuu ka soo daba dhaqaayay. Inyar markay socoto ayay misna soo eegtay.

Wuu soo daba socdaa, intii hore wuu kasoo dhowaaday. Wey carartay.

Habeenkaas oo dhan ayuu bursanayay, iyadana marba derbi uga boodeysay, mar luuq u galaysay, mar mooro sac ay uga dhuumatay. Markuu ka haray ninki ayay habeenkaas seexatay xeebta. Car-

www.bilehashi.se

ro maayo ayay intey sidi buur u dhistay barkin ka dhigatay.

Subixii xigay waxay gashay inay dawadii meel aan suuqa ahayn ay ka doondoonto. Balse kuma aysan soo guuleysan. Iyadoo daalan, gaajeysan, cabsi badan qabta ayay aabaheed usoo nqootay. Waxay u timid aabaheed oo la dul buuxo. Dhowr kalkaaliye ayaa dushiisa taagan.
Nabarki ayaa kusoo noqday.

Albaabka ayaa lagu celiyey Guduudo. Marki ay salaadii casar la adimay ayaa loo fasaxay inay usoo gasho aabaheed.

Wejigiisu wuu ildarnaa. Dhareer ayay afkiisa ka tirtirtay. Jirkiisu wuu bararay intey maqneyd.. Calooshiisu aad bay u socotaa ilaa uu heyn waayay. Isagaa u sheegay. Warkiisu wuu yaraa, awoodiisu wey liidatay. Xumad kulul ayuu la jaraynayay.

“Aabe waad fiicnaan doontaa ilaah idankiis! Ayay dhegta ugu sheegtay. Il daban ayuu kusoo eegay. Markay aragtay wax fiish aad moodo oo indhihiisa saaran ayay caag biyo ah lasoo ag istaagtay oo wejiga u meyrtay. “ilaahay awlaadaada

baari ha kaaga dhigo” ayuu u duceeyey.

Subixii xigay waxaa qolka ugu yimid Dhakhtarki oo wiil turjubaan ah wata. Guduudo ayay ka codsadeen inay soo raacdo. Waxay yimaadeen teendho dhakhtarka xafiiskiisa ahayd. Miis iyo waxaa yaala kuraas afar ah. Miiska waraaqo badan ayaa dul buuxay.

Dhakhtarki ayaa ugu hor fadhiistay. Shaar aad khamiis gaaban moodo oo cad ayuu xirnaa. Tuutaha ciidanka ayaa uga hooseeyey. Markii ay Guduudo hor fadhiistay dhakhtarkii ayuu turjubaankina dhinac fadhiistay Guduudo.

“how are you?” ayuu afqalaad xaaladeeda uga wareystay.

Wejigiisa wuxuu u ekaa qof faraxsan. Wuu u dhoolacadeynayay. Inkastoo afkuu ku hadlayo aysan fahmin hadana inuu qof faraxsan yahay wey u muuqatay.

- Daal badan baa wejigaaga ka muuqda! Ayuu misna su’aal kale u daba dhigay.

”Waan fiicanahay, alxamdulilaah. Dawa-

www.bilehashi.se

di aad noo qortay meelkasta waan kasoo waayay datoore" ayay u sheegtay. Turjubaankii ayaa dhakhtarki ugaandhees usii turjumay.

"Qof weyn baad tahay Guduudo" ayuu yiri dhakhtarki. Ma rabo inaan rajo been ah ku siiyo balse runta ayaan ku sheegayaa. "aabahaa dawo la'aan ma noolaan doono maalmo badan" ayuu u sheegay.

Wuxuu u baahan yahay in laga miiro dhacaanka jirkiisu aruuriyey. Bararka aad u jeedid waxaa keenay dhacaan badan oo jirkiisa ku jira. Dhacaan uu beerkiisu kala maareyn lahaa haduu caafimaad qabo. Wuxuu u baahan yahay inuu wakhti dheer cisbitaalka joogo oo uu dawo qaato. Sow ma fahmin?

- Haa waan fahmay.

- Si marka waxaas oo dhan loogu sameeyo adiga ayaa lagaa doonayaa inaad go'aan gaartid.

"Go'aan" cimrigeeda lama weydiin su'aal noocaas ah. Go'aan gaar! Muxuu ka wadaa.

- ”Waxaan kaa codsanayaa inaan ku guursado, aabahaa dawada uu u baahan yahay anigaa ballanqaadaya inuu helo” ayuu dhakhtarki usoo bandhigay ham-migiisa.

Markuu intaas yiri ayuu dhakhtarkii dhabarka saartay kursigii uu ku fadhiy-ey jawaabtana halkaa ku sugay.

”Anigaa wax guursanaa miyaa” ayay su’aashay turjubaanki si ay u kala hub-sato warka.

”Haa isagaadna guursanee” ayuu farta ugu fiiqay ninki ugaandheeska ahaa.

Guduudo oo aanan wax ceynkaas ah fi-leynin ayaa labadii nin marba mid eeg-tay.

- ”Go’aanka adiga ayaa leh” ayuu dhakhtarki isku dayay inuu jawaab cad ka helo.

- ”Yacni haduu dhakhtarka aniga i aroo-so aabahay wuu caawinaa” saas muu ka wadaa? Ayay su’aashay turjubaanki markale.

www.bilehashi.se

- ”Haa saas waaye”

- ”ee aniga hee... gabar aan ahee aabahay in la i weydiisyto sow moohoo”

Wey ka saxsan tahay turjubaanka iyo dhakhtarkaba. Dhaqanka soomaaliyeed iyo diintaba waa in gabadha aabahed la weydiistaa.

- ”go’aanka adigaa iska leh” ayuu dhakhtarku yiri isagoo aad moodo inuu ismacneynayo kuna qanacsanayn inay aabaheed u dirtay.

Turjubaankii ayaa kasii dhaadhiciyey. Sow ma fiicna laakin adiga oo ninka ogol kadib in aabahaa loo tago? Ka feker! Go’aanka ha ku degdegin. Aabahaa sow kama naxaysid? Xaalkiisa caafimaad sow uma jeedid. Muxuu kuu dhalay? Ilamaha kula dhashay yaa ugu yar?

- Xirsi aa la dhaahaa?
- Meequu jiraa?
- 4 sano
- Xirsi inuu agoon noqdo maa rabtaa. Aabahaa adoo dawayn kara miyaad doonaysaa in indhahaagoo shan ah xabaalaha loogu qaado?

Ninki ugaandheeski ahaa ayay markale fiirisay.

Iyada ayuu soo eegayaa. Ninki soomaliga ahaa ayuu af aysan iyadu aqoon kula hadlay. Kii soomaaliga ahaana afki qalaad ayuu ninkii qalaad ugu jawaabay.

- Ilaa caawa aan kasoo fekero! Ayay ka codsatay labadi nin oo weli afqalaad iskula hadlaya.

Way ka aqbaleen.

Qolka kasoo bax! Ayuu wiilki turjubaanka ahaa ku yiri. Labadoodi nin ayaa ka hor baxay. Iyada oo feker gashay waxay hilmaantay inay xafiiska dhakhtarka aysan sii fadhin karin.

- Bax aabahaa u tag. Waxbana ha u sheegin ilaa aad go'aan gaartid! Ayuu wiilki turjubaanka ahaa ka turjumay dhakhtarkii madoobaa.

Habeenkaas waxba aabaheed uma aysan sheegin. Isagaa tiisii heysatay. Subixii xigay shib. Goor ay casar tahay ayuu wiilkii turjubaanka ahaa ugu yimid iya-

www.bilehashi.se

doo cisbitaalka hortiisa, meel geed ah harsanaysa.

- Cadeey haye, Wax akhbaar ah? Ayuu weydiiyey isagoo taagan oo aad moodo inuu u dhoolacadeeynayo.

Akhbaarta uu i weydiiyey waa max-ay? Koley ma xiiseynayo akhbaarta caafimaadka ee aabaheey. “Sidi shalay wuu dhaamaa alxamdu lilaah” ayay ku tiri iyadoo diideysa inay wixi kale ka ha-dasho.

- Arrintii kalena? Ayuu weydiiyey isagoo aanan markaan u qosleynin. “Aabahaa ma u sheegtay?”

- Maya! Madaxa ayay u ruxday.

- Haye, adiga wax go’aan ah ma gaartay?

- Maya! Madaxa ayay mar labaad u rux-day.

Agteeda ayuu soo kadaloobsaday. Kabi-hiisa in dhawaan loo soo baalashay ayaa u muuqday. Wey dhalaalayaan. surweel madow iyo shaar buluug ah ayuu xiran yahay. Dhuunta garabaati ayaa ugu

xiran.

- Nasiib baad leedahay! Ayuu usheegay. Laakiin nasiibkaaga adigaa ku cayaaraya. Aabahaa dawo ayuu u baahan yahay. Xaalkiisa caafimaad aad buu u liitaa. Intuu dhalay adigaa ugu weyn. Ma awoodid inaad baasaboor u samaysid oo dibeda u qaadid, xataa dawo uma iibin kartid. Aabahaa oo xanuun la sakaraadaya ayaad aragtaa maalin walba. Markaasuu nin dhakhtar ah uu ku jeclaaday, nin raba inuu ku guursado! Maxaad ku diidee. Ninka horta ma ogtahay inuu muslin yahay?

- Maya! Indhaha ayay kala furtay. Arrin ay ay la cajabtay inuu u sheegay indhaheeda ayuu ka gartay.
- Afsoomaali kuma hadlo! Ayay u sheegtay dhaliishiisa.
- Hehehe, Qofkastoo muslin ah ma inuu afsoomali ku hadlaa? Yareey cayaar ayaad heysaa! Dhakhtarkana wuxuu isoo faray inuu aabahaa cisbitaalka ka saari doono beri subax aroorti hadii aad go'aan gaari weysid. Meeshaad doonto la'aad aabahaa. Gurigiina gee oo xanuun uusan xamili karin ha silco. Adigaa baday, gabadhiisa uu ku curtay ayaa ba-

www.bilehashi.se

day!

- Sug! Ayay ka daba qeylisay. Waan ogolahay laakiin aabaheey ha i weydiisto!

- Saasaan kaa rabaa cadeey Caqlileey!

Ilaa fiidkii ayay dhinac fadhisay aabaheed oo intii hore dhaama. Xataa wuxuu ka wareystay hooyadeed iyo carruurti. Insha allah anagoo nabadqabna ayaan u tagi doonaa! ayay u sheegtay.

Arrinta madaxeeda ka weynaatay uma aysan sheegin weli. Waa gabar. Wey ka xishootay. Waxay sugeysay in aabaheed loo yimaado oo laga soo doonto.

Fakhri wax walbuu kugu kalifaa! Xataa tuugonimo iyo nin aabahaa la'eg inuu ku naageysto.

Maalinkii danbe ayay dhakhtarkii iyo wiilkii turjubaanka ahaa u yimadeen, una sheegeen inay xalay aabaheed weydiisteen, isna uu ka ogolaaday.

Shib ayay ka tiri. Miyey ka naxday mise ku faraxday. Midna wejigeeda kama muuqan. Waxay ku yiraahdeen beri gal-

ab ayaa lagu mehrinayaa waa inaad is diyaarisaa.

Sideen isku diyaariyaa?

Wiilki Turjubaanka ahaa ayaa lagu daray. Magaalada ayay tageen. Wuxuu usoo iibiyey labo baati, dirac iyo garbisaar, labo safaleeti iyo kabo jambalka xaragada ah. Markay xerada cisbitaalka kusoo noqdeen waxaa la siiyey taleefanka gacanta.

- Weligey ma isticmaalin taleefan! Ayay u sheegtay wiilki siiyey. Anigaa ku baraya sida loo isticmaalo. Waxba ha ka cabsan. Gabar ninkeedu dhakhtar yahay ayaad tahay.

Galabtii xigtay waxay iskugu yimaadeen ninkeedi iyo turjubaankisii teendho kale oo isla cisbitaalka ku taalay. Turjubaanki ayaa usheegay inuu aabaheed walaayadii isaga usoo wakiishay. Inyar markey joogeen waxaa yimid labo nin oo wadaado ah. Waxaa meesha keenay labo askari oo dhinac socotay wadaadada. Markey teendhadhi keeneen ayay salaam sharaf u saareen dhakhtarki kadibna dib u noqdeen.

www.bilehashi.se

Wadaadadii lacag ayuu siiyey markey howshooda dhamaysteen. Nimanki sakuuritiga ahaa ayuu ugu yeeray si ay usii dhaweeyaan.

Habeenkaas markay soo hubstay inuu aabaheed seexday ayuu meeshi ka watay. Waxay ku aqalgashay xerada amisom qol uu iskagu ka degenaa.
Sariir weyn ayaa u taalay, armaajo, miis iyo labo kursi.

Subixii koowaad oo ay ninkeeda kasoo hoos toostay waxay u timid aabaheed oo ay la joogaan labo kalkaaliso. Wuxuu amray inay biyaha uu aabaheed la baraaray ay ka miiraan. Dawadii Xamar dhan laga waayayna isagaa u keenay.

§

www.bilehashi.se

## 6.

Arliyo wey cidlootay.

Guduudo iyo Arliyo sagaal iyo toban habeen isma aysan arag. Guriga howshiisa keligeed ayay ku noqotay, wiilashi iyadaa hooyo u noqotay. Hooyo iyadaa ciidan u ahayd. Welwelkuna wuu dheeraa.

”Aabe tolow siduu xanuunkii ka noqday? Goormey iman doonan aabe iyo Guduudo?”

Hooyo sidii ayay weli u hadal kululeyd. Afrax iyo Xirsi waxaad moodey in la dayacay. Waa la iloobay. Habeen Arliyo oo keligeed jiifta derinti ay la qeybsan jirtey Guduudo, ayuu Afrax hoosta kasoo galay. Intuu dhabarka ka taabtay Arliyo ayuu weydiiyey “Aabe goormuu imaanaa?”

Wey ogeyd Afrax dadka hadalka badan ma ahayn. Haduu hadlo wuxuu ku hadli jirey war weyn.

”Ma ogi” ayay ugu jawaabtay. Hadanna intey isqabatay ayay isku canaanatay maxaad wiilka yar sidaas ula hadashay.

”Aabe iyo Guduudoba mar dhow ayay imaanaayaan” ayay misna ku tiri ee iska seexo.
”Aabe ma fiicnaaday” ayuu su’aal hor leh weydiiyey. Oo ileyn Guduudo ma ahayne wuxuu ka welweshanaa waa aabe.

Dadka waaweyn dhaliishooda waa inay-

san carruurta la fadhiisan oo aysan u sharaxin marki dhib dhaco.

Isha ayuu kala socday intaas uu aabihiis xanuunsanaa. Sida hooyo dabcigeedu uu isku bedelay isha ayuu kala socday. Sidaa oo ay tahay hooyo iyo gabdhaha waaweyn midna carruurta ma aysan kala hadlin xaalada aabe. Xataa maalintii magaalada loo qaaday waxba looma sheegin. Balse waa hubaal inay isweydiinayeen meesha aabahood loo qaaday. Waa sababta uu Arliyo caawa u weydiiyey su'aasha markuu is heyn waayay, qol mugdi ah dhexdiis, saqdhexe habeenimo iyo cod aad moodo inuu sir weydiinayo.

Maalin ayay Hooyo oo cadhaysan beerti ka timid. Markii ay soo gashayba waxay bilowday inay dhaliisho Arliyo. "Carruurti aaway?" meeshaan baad keligaa iska fadhisaa sidi inuu cilaan kuu marsan yahay? Maxaad keligaa la fadhisaa? Aaway howshi guriga oo lagaaga tagay?

Canaan meel ay ka timid aysan Arliyo garan karin ayaa la canaantay. "Hooyo is deji" markay ku tirina intii hore xanaaq ka badan ayay xanaaqday. Dharbaaxo kulul ayay wejiga kaga dhufatay. Bax,

www.bilehashi.se

carruurta soo xaree qoraxdi way dhac-dee! Ayay ku amartay.

Arliyo oo aan ju dhihin ayaa Xirsi iyo Afrax ka doontay guriga Sareedo halkaas oo ay carruurta Sareedo kula cayaaray-een.
Markay carruurti keentay ayay dhuuma-tay oo gurigi ka carartay. Qeylada ayay xamili weysay. Galabta oo dhan ayay keli fadhisay oo ay ka fekeraysay xaalada aa-baheed iyo Guduudo oo ay aad ugu xi-istay. Cidlo ayay dareentay. Ciil ayaa usii raacay. Wey xamili waysay dareenkeeda karkaraya. Hadii ay sii joogto waxay ka baqday inay hooyadeed afka u furto oo ay ka inkaarsato.

Xagey u socotaa gabbalkii oo sii dha-caya?

Waxay qaaday luuqii Aay Faay iyo eedo Sareedo aqaladooda u dhaxeeyey. Jid-ki ay marar badan martay ayay qaaday. Dharka la dhaqayo ayay jidka lasoo mari jirtey. Balli ay dharka kusoo dhaqi jirtey markay agmarayso ayay istaagtay. Biyihi xareeda ahaa ee balliga buuxiyey iyadoo eegeysa ayay salka dhulka dhigatay.

Qorax dhac ayay ahayd. Cirku midabkiisu dahabi yahay, qoraxduna ay baalka sii dhiganayso.
Waxoogaa markay keligeed fadhisay qalbiguna uu ku raaxeysanayo aamusnaanta iyo degenaanta goobta ayay aragtay cirki oo midabkiisi madow isku bedelay. Xidigo ayaa cirka isku sharaxay. Leydh badan ma jirin, waxa kaliya oo uu jirku dareemayay huur iyo dhidid sidaa awgeed ayay waxay ku fekertay inay balliga gasho oo ay isku qaboojiso. Hareeraheeda ayay eegtay. Cidna ma joogto, cidna ma iman intii ay fadhisay. Aayar ayay guntiinadii iska siibtay. Safaleetigi ayay iska siibtay. Halki ay fadhisay ayay uga tagtay. Garbisaarti ayay dhexda ku xiratay. Biyihi ayay gashay iyadoo qaarka sare ka qaawan. Waa habeen, waa mugdi, in badan ayay meesha fadhisay, cidna ma soo marin. Keligeed inay tahay ayay hubtay.
Biyihi ayay lugaha la gashay. Hore ayay u sii socotay ilaa biyuhu sinta ka gaareen. Dabadeedna xabad xabad ayay iskugu tuurtay biyihi iyadoo naaso curdad ah u horeeyaan.

Wax badan ayay balligan ku dabaalatay, si fiican ayay biyaha u taqaanay. Caawa-

www.bilehashi.se

na keligeed ayay marba dhinac iskugu gedgedinaysay. Deganaanta, biyaha xareeda ah iyo jawiga degen ayaa raaxo ku faafiyey qalbigeeda. Laabta ayaa u qabowday. Dhibki ay kasoo carartay ayay iloowday.

Hees ayay heestay. Biyihi iyadoo ku baashaalaysa sidii malaaygii ayuu wiil korka ka arkay. Markii hore wuxuu moodey noolaha webiga ku nool oo dabaalanaya, markuu heesteeda maqlay ayuu gartay inay waxu yihiin aadane, welibana gabar tahay.

Codkeeda ayaa soo jiitay. Wuu sii eegay isagoo meel fog ka eegaya. Dhabar dhabar ayay isku gedisay oo iyadoo dhabarku u hooseeyo ayay gadaal gadaal u dabbaalatay. Naaso taag taagan oo biyaha dul sabbaynaya sidi doonti ayuu arkay.

Gadaashiisa ayuu eegay. Waa keligiis. Weger! Ayuu hoosta iska yiri! Ma riyaa? Ma runbaa?

Wuu kala hubsaday inuu keligiis yahay. Meel walba ayuu iska eegay. Markuu arkay dharkeeda meesha ay uga tagtay ayuu dharkii u dhuuntay. Dharkee-

di ayuu ka soo dhifsaday meeshii ay yaaleen. Guntiino, safaleeti iyo kabo dacas ah. Guntiinadi ayaa usoo caraftay, sanka ayuu saartay. Waa la saaqay wiilki. Wuxuu moodey inuu shafkeedi sanka saartay.

Dharkeedii ayuu dhagax weyn ku hoos qariyey. Iyadii ayuu sii eegay. Iyadoo taagan ayay gacmihi kor uqaaday sidi inay timaha gadaal u xiranayso. Naasihii oo aad labo gantaal moodo ayaa u muuqday misna. Wax badan kama foga, geed ayuu ugu gambanayaa.
In wax saaqayaan jirkiisa ayuu dareemay. Inuu sakhraamayo ayuu dareemay, intuu is jirka isku kaduudiyey ayuu macawisti xoqxoqday.

Mar buu damcay dharka masiibataa oo biyaha ma ugu gashaa. Hadana wuu isceliyey oo wuxuu is yiri sideedaas allow ku daa! wey macaantahee. Halkiisi ayuu u kadaloobsaday isagoo ushiisa cuksanaya.

Biyihi ayay kasoo baxday.

Dayaxa iftiinkiisii buuxa ayaa tusay jirkeedoo kaamil ah. Biyihi ayay kasoo so-

www.bilehashi.se

cotaa. halkii ay maryaheeda ku ogeyd ayay usoo socotaa. Isna meeshey usoo socoto ayuu ku gambanayaa. Saanteeda ayuu la dhacay, sida degen oo laafyaha leh oo ay xagiisa ugu soo socoto ayuu moodey in loo soo galbinayo gabadha.

Dhexda waxaa ugu xiran garbosaar. Garbosaar qoyan oo jirkeeda ku dhegtay. Naasaheeda oo aad moodo inay kusoo eegayaan ayaa kasoo horeeya jirkeeda. Biyaha jirkeeda ka da'aya ayay iska daadisay. caloosha, garbaha, luqunta iyo bowdyaha. Uma ay jeedo in loo gambaday caawa..

Waxay timid meeshii ay dharkeeda ku ogeyd.
Markay weysay maryihii ayay hareeraha eegtay sidi inay hubsanayso inay meel sax ah timid. Waa meeshii ay uga tagtay dharkeedi. Wey fahantay in wax khaldan yihiin! Hareeraha fog fog ayay iska eegtay iyadoo labada gacmood ku asturanaysa labada naasood.
Cidna ma joogto. Markay waxoogaa yaaban tahay welina aysan quusan ayuu gadaasheeda uga soo baxay wiil. Ul ayaa garabka u saaran, labada gacmoodna usha ayay uga laalaadaan.

“Hoy!” oo maxaad ahayd ayuu weydiiyey sidi qof uusan weligeed arag.

Intey ka oroday ayay geed gadashiis ka gashay. Wuu ka daba orday.

Waxay u sheegtay wixi dhacay iyo in dharkeedu maqan yahiin.

“hayaay! Walaalo waan kula raadin lahaaye…hade gabar weynoo qaawan yaa wax la raadin kara” ayu yiri

“Aboowoow waanku baryaa ee ila raadi” ayay ka barisay.

“Ma gabdho kalaa kula socday?” ayuu is yiri kala hubso inaad keligiin tihiin iyo inkale.

“Maya keligeey baan ahaa”

“Oo ma qooq baad la hurdi weysay maxaa balliga ku keenay?” ayuu yiri

“War inkaarqabe qooq beele kacoo dharka ila raadi ama idhaaf oo gurigiina aad”

www.bilehashi.se

Wuxuu ahaa wiil la fil ah iyada, haduu u bato dhowr gu ka weyn, wejigiisa wax-ay qiyaastay inay mar ama labo aragtay laakiin magaciisa iyo tuuladuu ka yimid ma aysan aqoon. Koley reer Doogleey ma ahayn. Haduu yahay wey garan lahayd.

“Oo hadaan maryahaagii kuu helo max-aad igu abaalmarin?”

“Horta iisoo hel! Ayay kutiri

Jawaabteeda wuu ku qancay. Inyar kadib buu dharkeedii dhagaxi hoostiisa uga ka soo saaray.

“waan helay ee maxaad i siinaysaa?” ayuu yiri intuu dharkeedii korka ka tu-say isagoo meel fog ka taagan.

Intey kusoo oroday ayay is tiri maryahaagii kasoo daf. Balse aad buu uga dheeraa, shafkiisa balaaran iyo gacmihiisa dhaad-heer ayay kala gaari weysay. Wuu feero qaawanaa. Macawista dhexda ugu xiran iyo usha mooyee wax kale uma aysan wehlin qudhiisa. Raggu go’ bey qaadan jireene aaway go’iisi. mise markuu gab-adhoo dabaalanaysa daawanayay ayuu go’i ka dhacay.

“War isii dharkeyga hadaad muslin tahay” ayay ku tiri markay gaari weysay.

“Kaalay qaado” ayuu ku yiri isagoo kor u haya maryihi.

Mar kale ayay kusoo booday. Intay la xarbinayso wuxuu ku raaxeysanayaa naasaheeda oo shafkiisa taabanaya markey kusoo boodo.Wuu ku qoslayaa. Markuu jirkeeda taabtaba wuu sii weyraxayay.

Markay quusatay oo ay hortaagan tahay ayuu yiri;

“Hadaan nin fiican noqdo oo kuu naxariisto dharkaagana ku siiyo maxaad i sinaysaa?”

“War hooy , ilaahma taqaan horta?” Yuusan xaal ku raacine dharkayga isii hadaad ilaah ka baqaysid.

Dharkeedi ayuu usoo taagay.

Halkii uu taagnaa ayuu fadhiistay. Intay dharka xiranayso ayuu jirkeeda kasii bogtay.
Timaheedu inay qoyan yihiin ayaa u

www.bilehashi.se

muuqday, Qoorta inay ku daadsan yihiin ayuu arkay. Ma u tirtirtaa timaha ayuu isyiri. Isha ayuu lasii raacay jirkeeda inteysan guntiinadi xiran, sanka jaban, dibnaha kuuskuusan, luqunta, naaso kuuskuusan oo dayaxa eegaya, xudunta markuu marayo ayuu is yiri ma ku boodaa caawa wixi dhacayaba ha dhacaanee.

Ma samaynin.

“Ma reer Abiikar” baad tahay ayu weydiiyey.

“Maya ma ihiye, ma horaad ii aragtay?”

”Dhowr gu ayaan ku wiideyn jirey ayuu u sheegay. Sow da’di Guduudo ka yarayd ma tihid? Sow Arliyo matihid?

Waxay garatay inuu wiilku si fiican u yaqaano. ”Adigu maxaad ahayd?” ayay weydiisay iyadoo safaleetigi sii xiranaysa.

”Mid aad maankiisa deeqday baan ahay”

“War maanka alle kaa qaade maxaad ahaydaan ku iri”

“horta walaalooy gacalisooy inkaarta

naga dhaaf, maalintaan ku arkay walaahi bilaahi talaahi malab baa la ii kaa mariyey ee qof caadi ah iska dhig"

"hadaan caadi ahayn ma waalanahay?

"maya abaayo macaan, ma waalnid mid adiga kula mid ahna weligeyba ma arag. Midab daa'uus laheey adigaan maanka kugu hayay ee wax ila qabo ilaahaan kugu dhaarshee"

Wey qososhay. Codkiisa ayaa soo jiitay iyo sida uu ereyada iskula helay.

"Hayeh ii wad" ayay tiri iyadoo u dhoolacadeyneysa, hoostana ka jecleysatay amaanta uu amaanayo.

"Wiido dheh"

"haa...Malab baa walaalay la ii kaa mariyey subaxaan ku arkay, waa iga daacad iyo dhab. Subaxaas wixii ka danbeeyey suuradaadaa ayaa madaxayga ka bixi waayay, markaas inaan kusoo wiideeyo sow jid maaha...

"Hayeh, saa maxaad samaysay?"

www.bilehashi.se

”Maxaan samayn lahaa hee Mowjado baas baa igu furmay maalin iyo habeenba wixii subaxaas ka danbeeyey”.

”Oo sideed ku ogaatay inaan ina Abiikar ahay? Guduudana aan da’dii ka yarayd ahay?”

“Hoy warkeyga show kumuu dhicin, sow kuma dhihin waxbadan baan wiido kuugu jiray,oo korka kaala socday? “ ayuu su’al ku celiyey iyadi.

“Waan baxayaa” ayay hadalki usoo gaabisay, hooyadeey ayaa i sugeysa.

“Maya ha bixin, koleey hooyada waad kasoo dhuumatay, habeeno kalena waad kasoo dhuuman kartaaye, bal inyar ila joog”

“Maxaad rabtaa” ayay cod kulul ku tiri.

Ragga la iskuma jilciyo. Guduudo ayaa dhowr mar u sheegtay raga markaad isku cusub tihiin lama tuso jileec iyo afmacaani. Hadii kale gabar xun ayay ku moodayaan.

“Waxaan rabo anigaa kuu sheegayee

xageed u cararaysa, bal waxyar ila joog”

“Dantaada sheego! Aniga waan bax-ayaaye”

Danteydu waxaan moodey inay iska caddahay ayuu yiri. Waxaan rabaa inaan mataano noqono sidi midig iyo bidix.

“macsalaamo” ayay ku tiri iyadoo kasii dhaqaaqaysa. Habeenka koowaad jileec lama tuso.

Markay gurigooda gaartay waxay u tag-tay reerkii oo hurda. Hooyadeed Luul waayahaan dadka hortood ayay seexataa. Caruutina iyadey la seexdeen. Aabeheed Abiikar iyo Guduudana bil ku dhawaad magaalada ayay jiraan.

Markay derinteedi soo seexatay ayuu u shidmay filinkii madaxeeda uu shidan ji-rey. Aabe caafimaadkiisa tolow waa side? Sida ugu xun ayay ku fekeri jirtey. Inuu caafimaadkiisu kasii xumaaday. Gud-uudo waa tii lahayd isagoo xabaalaha loo sii wado ayay ku riyootay. Hadii u caafimaadkiisu fiicnaan lahaa sow mar hore maysan soo noqdeen? Ayay isweydiisay.

www.bilehashi.se

Welwel cusub ayaa ku beermay markay xasuusatay dabciga qalafsan oo ay hooyadeed yeelatay. Hooyadeed waxay ahayd qof sabar badan, xanaaqeedana dhif iyo qaliil la arki jirey.

Hooyo wey caatowday xataa. Sidi hore uma hadal iyo kaftan badna. Dhirif iyo daal badan ayaa ka muuqda markey aragto. Iyadana ma la ileystay?

Wey neefsatay. Neef badanoo samba-baheeda ka buuxay soo tuurtay. Sidii qof daalan ayay u neeftuurtay, markay jawab u heli weysay su'aalaha badan ee madaxeeda buuxiyey.

Wey daalan tahay oo saacad ka badan ayay dabbaalanaysay. Markey soo xas-uusatay jawigii degenaa iyo wiilkii caawa ku weyraxay hoosta ayay ka qososhay.

Marar badan ayay keligeed isweydiisay sida carruurta loo sameeyo. Ilaa gu'gi hore ayay is weeydiin jirtey.

Caawa nin weynoo weyraxay markay aragtay wey qiyaastay inay caawa curad-keedu caloolgali karay. Hoosta ayay iska-

la qososhay markay xasuusatay inuu ku yiri “wax badan ayaan wiido kuugu jirey”. Tolow maxaan u arki waayay aniga? ayay isweydiisay. Mise waa afmiinshaarnimadii ragga oo ay Guduudo u sheegtay.

Markay xasuusatay muuqalkiisa, inyar buu iyada ka dheeraa, shafkiisa balaaran iyo garbihiisa waaweyn markay xasuusatay ayay istiri ma ahayn afmiinshaar. Daacad buu ahaa. Waayo wuu ii abtiriyey, wuxuuna xataa ogaa inaan Guduudo da’ada ka yar ahay.
Weligeed nin lama aysan haasaawin. Iskaba dhaaf qof iyadoo qaar qaawan arkaye. Horta magaciisu muxuu ahaa?

Ma aysan weydiin. Balaayo ku aragtay Guduudooy. Rag la iskuma jiliciyo ayay itiri, anigana waan dhagaystay.
Tolow magaciisa hadaan iska weydiin lahaa? Taasi sow jileec maaha? Oo sideen hada magaciisa ku ogaadaa? Tolow miyuu soo noqon doonaa? Mar kale ma is arki doonaa?

Dareen iyo xiiso macaan ayay dareemeysay. Caloosha ayay salsalaaxatay. Feynuusti ayay damisay. Dhinaca kale ayay usii jeestay.

www.bilehashi.se

Madaxeeda ayuu ka bixi waayay. Wey ka gam'i weysay. Waxay xasuusatay inuu lahaa "Hoyadaa koley waad kasoo dhuumatay, markalena waad kasoo dhuuman kartaayee waxyar ila joog" Waa runtiis. Waan u dhuuman karaa markale. Allow markale keen!

§

## 7.

Hugun soo horeeyey iyo Gugac ayuu cirkii isqabsaday intuusan diiqii Aay Faay ciyin. Dadka oo weli jiifa ayuu cirki roob aan kala go lahayn soo daadshay. Luul Maxamuud, Abiikar xaaskiisii ayaa hurdadi kasoo booday raxmadi alle oo da'aysa. Waxay kusoo toostay roobka dhibcaha waaweyn oo tarniiga guriga garaacaya.

Waxay xasuusatay inay beerti ka gaarto intuusan roobku dhaawicin. Isbuucaas ayay beertu usoo go'eysay. Waxay islaheed khudaarta ayaad Xamar geyn

www.bilehashi.se

doontaa. Markay kuu gadmatana waxay is lahayd raashinkaad u baahan tahay Xamar kasoo iibso. Saliid, sokor, bariis iyo baasto. Waxay is lahayd markaad soo adeegatidna Abiikar soo firii.

Keydkii raashinka mar hore ayuu ka dhamaaday, in badan waxay reerku ku noolaayeen galay iyo khudaar, iyo Shaaha bilaa sokor ah.

Beerti ayay u carartay iyada oo Arliyo usii sheegeysa inay carruurta ka kiciso, wejiga u dhaqdo oo ay quraac siiso.

Markay dhexda marayso ayay ogaatay inay yaambadii kasoo tagtay. Hore ayay usii oroday. Kab ayaa ka dhacday intay ordeysay. Dhooqadii dhulka ayay cagta la gashay. Roob dhibco waaweyn ayaa wada qooyay jirkeeda. Iyadoo bashaq ah ayay beerti gaartay.

Waxay u timid Caasho oo ay beerta wada falan jireen oo madaxa gacmaha ku heysata. Biyihi baa buuxa dhaafay. Cirki baa balaqmay, biyhii baa buux dhaafshay. Khudaartii ay beereen wax badan ma muuqdaan, biyaha ayaa ka sare maray.

Halki bay Luul iyo Caasho isku calaacaleen. Yey u calaacalaan? Yay u sheegtaan in beertu ay hayd waxay carruurtooda quudin lahaayeen bilaha soo socda. Yay u sheegtaan inaysan wax kale heysan. Luul yey u sheegataa in ninkeedii labo bilood cisbitaal jiifo? Oo carruurti aysan masruuf aan beertan ahayn aysan u heynin.

Markay in badan beerta agteeda taagnaayeen ayay Caasho iyo Luul oo sabar is faraya kasoo dhaqaaqeen beerti oo aad webi moodo. Intey ishu qabato waxaa buuxay biyo lagu dabaalan karo.

Goor qoraxdu ay sii dhacayso iyadoo gurigeeda iska dhex fadhisa, carruurtuna agteeda fadhiyaan ayaa ilinki xoog loo soo garaacay.

Luul oo yaaban qofka sidan xooga leh illinka usoo garaacaya ayaa u istaagtay. Markii ay albaabka furtay waxaa ka hor yimid odey Xuud oo shaarka garabkiisa la hayo.

Waxaa kuleetiga ku dhegen labo nin oo garkoodu baxay. Abiikar ayay la da'ahaayeen markey qiyaastay. Wejigoo-

www.bilehashi.se

du wuu ku cusbaa labada nin ee Xuud wada.

- Luul Maxamuud adiga miyaa?
- Haa
- Abiikar xaskiisa miyaa?
- Haa
- Guduudo hooyadeed miyaad tahay?
- Haa ee maxaad rabtiin?

Odey Xuud ayay kala tureen.

Iyadii ayuu mid dhuunta qabtay. Mid kalaa uleeyey.
Carruurtii baa sastay markay arkeen raga hooyadood uleynaya.

“Nacalatulaah calayk” ayuu ku yiri Luul oo markaan ushi xanuunkeeda dareentay oo qeylodhaan afki furatay. Yey u qeylo dhaansataa. Sowkii odeygii deriska ay ahaayeen isagoo la wado laga hor keenay.

Gadaal waxay ka ogaatay inay ragu ka tirsanaayeen Alshabaab. Waxay soo ogaadeen inay Abiikar iyo Guduudo ay u tageen cadowgooda kufaarta ah ee Amisom.

- Hadii ay ninkaaga iyo gabdhaada soo noqon waayaan maalinka jimcada ah waan soo noqonaynaa, markaan soo noqonanna gurigaaga iyo waxa ku jira baansiin iyo kabriid ayaan isqabadsiin doonaa.

Amar aan arxan lahayn ayay uga tageen.

Ma Xamar bey u carartaa oo Abiikar oo la dabiibayo ayay soo ceshataa. Luul markaas ma oga in gabadheedi la guursaday.

Waa subax talaado ah. Waxaa u haray arbaco iyo khamiis. Maalinka jimcaad guriga ayaa laga gubayaa.

Allow maciinlaawe u maciin!
Yey u dacwootaa? Yey kurbada heysa u bandhigtaa?

Awood badanoow waa la ii awood sheegtay! ayay ilaahay u dacwootay.

Aay Faay oo korka kala socotay masiibada maanta reer Abiikar heshay, ayaa usoo oroday. Waxay sugeysay intey raggu gawaaridooda ka koraan. Waxay u timid Luul oo weli dhulka taala, guntiinadana

www.bilehashi.se

toosisanaysa. Shaashkii ka dhacay intii la uleynaayay ayay dhulka uga soo qaaday oo u dhiibtay.

“Alshabaab magaalada waa laga saaray goormey lahaayeen?” waa beentood wax ay saareen maleh ee danyarta iyo dad shishe ayaa waxaas loo akhriyaa. Ayay tiri Aay Faay oo qudheedu aad moodo inay argagaxsan tahay. Maxay ku yiraahdeen?

- Gurigaaga ayaan gubeynaa hadii ay Abiikar iyo Guduudo imaan waayaan ilaa jimcaha.

- Aw abiikar suu noqday horta, wax akhbaar ah?

- Beri subax ayaan soo ogaan doonaa! Ayay Luul u sheegtay aay Faay inay Xamar u bixi doonto oo soo celin doonto intii guriga laga gubi lahaa.

Carruurti ayaa maqashay inay hooyadood Xamar u bixi doonto beri subax!

Markiiba Xirsi oo argagaxay ayaa hooyadiis kusoo orday oo isku duubay. “Hooyo ha naga tagin adigana” ayuu kuyiri isa-

goo ooyaya. Afrax ayaa isna dhinici kale hooyadi iskaga soo duubay.

Aabahood ayay ogaayeen in Xamar loo qaaday, dibna uusan usoo noqon. Wax-ay ka welwelayeen inay hooyadoodna soo noqon weyso hadii ay Xamar aado. Labada dhinac ayay iskaga duubeen. Wax badan ayay heysteen. Inay ka fuqaan ayay diideen. Ilin iyo cabaad ayay isku dareen.
Hadii ay casho siin laheyd oo ay sidaa ku maaweelin lahayd, wax u yaala maleh. Sacabki ugu danbeeyey galeydi xalay ayay u karisay.

Arliyo oo qof weyn ahayd oo waxna fahmi kartay ayaa hooyadeed ku tiri aan aay Faay wax noo soo weydiiyo?

- Maya! Qayaxan ayay ka horkeentay.. Luul waxay ahayd qof aan jecleyn inuu qofkale wax weydiisto. Xataa markii la daran yahay si ayay wax ugu heli jirtey carruurteeda.
Xaalku wuu xumaa markaan. Abiikar wuxuu u keeni jirey mar hore ayay go'een. Beerti waataas biyuhu ku fatahmeen. Gurigeedi waakan loogu hanjabay in laga gubi doono. Xagey aadaa? Xagey gacan

www.bilehashi.se

ka heshaa.

Qof uu ilaah u maciino ayaa maciino hela. Odey Xuud ayaa albaabki kusoo garaacay isla galabtaas. Markii ay nax-dinti iyo cabsidi ka degtay.

Markey albaabka ka furtay wuxuu wey-diistay cafis isagoo albaabka soo dhaa-faya!

- Oo maxaad naga samaysay Xuudoow? Anigaa ragga gurigiina soo tusay sowma-ha. Qorey ayay wejiga iga saareen ayuu u sheegay sababta uu u keenay. Waxay iga soo raaceen Xamar.

- Oo intaa ma ku daba socdeen inkaar qabayaashu?

- Haa, Leyloontaan saarnaa ayay gadaal socdeen.

Waxay iga soo raaceen cisbitaalka! Ayuu u warramay isagoo sii fadhiisanaya. Waxaan soo booqday, seygaaga, carruur-taada aabahood, saaxiibkeey Abiikar.

- Horta bishaaro! Aad iyo aad ayuu u ladnaa. Ilaahbaa mahad oo dhan ay u

sugnaatay. Lugihiisa ayuu ku socday, afkiisa ayuu ku hadlayay, xataa wuu ila xifaaltamay. Kow dheh!

Luul oo dhoolacadeyneysa ayaa tiri “Kow”

Wuxuu igu yiri biyo ayaa laga miiray, wasakh badan baa jirkiisa ka buuxay ayuu iisheegay. Dawo nafaqo siisana waa la siiyey. Mar dhow ayuuna soo bixi doonaa! ayuu iisheegay.

- Insha allah! Ayay Luul ugu dartay
- Insha allah!

Wax yar ayuu aamusay. Bishaaro kalena way jirtaa!

- Hayyeh! Afkaaga caano lagu qabay Xuudoow! Ayay Luul dhegta soo taagtay. Arliyo iyo wiilashina sidoo kale.

Wuu qoslay sidii qof xishoonaya.

- Guduudana waa la guursaday!
- Yaah? La guursaday? Shimee la guursaday? Yaa guursaday?

Ma fajac baa? Ma farxad baa? Ma naxdin baa? Odey Xuud wuu kala garan waayay

www.bilehashi.se

su'aalaha badan waxa sababaya.

- Waxaa guursaday dhakhtarki dabii-bayay Abiikar.

- Dhakhtar aa! Dhakhtar reer ayo ah?

- Walaahi waxay iigu sheegtay reer aan cimrigeyga aan maqal. Ugaandhees bey igu tiri.

- Ugaandhees. Awoowgeey Shimaaliyoow! Ugaandheesna yey galaan?

Madaxa ayuu Xuud ruxay. Wuu qirtay inuusan reerkaas uusan cimrigiisa maqal iyadana uusan ku dhaamin.

Laakiin waa nin fiican sidey Guduudo ii sheegtay. Alaab iyo dhar ayuu u iibiyey. Guri qurxoon ayuu u dhigay. Abiikarna aad buu ugu roon yahay ayay iisheegtay ayuu yiri.

Intaas kadib ayuu jeebka gacanta galiyey. Lacag waraaqo badan ka kooban oo dhexda laastiik uga xiran tahay ayuu usoo taagay. Guduudo ayaa igu tiri hooyadeey u gee. Ayuu ku yiri.

Waa wax wakhtigii loo baahnaa yimid! Ayay Luul usheegtay Odey Xuud.

Aad bay u nabad qabeen. Abiikarna hadii aan sax u fahmay wuxuu iisheegay inuu isbuuca danbe soo bixi doono.

Arliyo oo meesha fadhisay ayaa alalaaso qabsatay. Aay Faay oo warka inuu dhaafo diidan ayaa soo carartay. Aay Sareedo iyo gabadheedi weyneyd oo is daba ordaya ayaa daashkii reer Abiikar soo buuxsamay.

Bishaaro! Bishaaro! Bilkheyr! Walaasheey Guduudo waa la guursaday. Aabe wuu caafimaaday. Ayay warkii fiicnaa Arliyo kala hor tagtay martidi timid.

Alalaaso ayay isku dareen.

Mar dambe ayay Aay Faay weydiisay ninka guursaday gabadha.

- Waa nin dadka magaalada ah! Ayay Luul u sheegtay maadaama ay mar hore ilowday reerka ninka uu galo magacooda.

www.bilehashi.se

§

## 7.

Subixii danbe ayuu Abiikar gurigii-sii yimid. Lugihiisa ayuu ku socday. Wuxuu la socday leyloon magaalada kasoo baxday oo Doogley istaagay. Xataa bakoorad ma wato!
Ilmihiisii ayaa usoo kala orday markey arkeen aabahood. Deriskii baa gurigi soo buux dhaafshay. Aay Faay oo jecleyd inay wax walba ogaato ayaa ugu su'aalo badneyd dadka.

Waxay si khaas ah u xiiseyneysay nin-ka taajirka ah ee Guduudo loo guuriy-ey. Waxay Odey Xuud ka maqashay inay

Guduudo soo dhiibtay lacag tiro badan. Lacag uu ugu sheegay inay gooynayso digaaga aay Faay oo dhan iyo Beerta Luul waxay sanad soo goyso oo la isku daray!

Marki hore wey rumeysan weysay. Balse markuu u dhaartay ayay aamintay.

Markey martidii ka tageen ayuu Abiikar jeebka gacanta galiyey oo lacag intuu haystay u dhiibay xaaskiisa Luul. Wuxuu yiri waxaa iisoo aruuriyey dhalinyaro igala shaqaysa garaashka oo markay xanuunkeyga maqleen iyiri intaan isku baani.

Arliyo iyo wiilashii ayaa diiday inay hooyo iyo aabe isku firaaqoobaan. Aabe ayay jilbihiisa soo hoos fadhiisteen. Habeenkii oo dhan ayay wejigiisa eegayeen, sheekadiisana dhagaysanayeen. Markuu Afrax oo aan hadal badnaan jirin ku yiri aabihiis. “aabe aad ayaan kuugu xiisnay” Abiikar ilinta ayuu isku heyn kari waayay. Wuxuu isna ku yiri “anba sidaan hadaan habeen walba idiinla sheekeysan lahaa mar hore ayaan cisbitaalka kasoo bixi lahaa”. Sheekadu waxay noqotay dooro iyo ukun horta yaa soo horeeyey.

www.bilehashi.se

Subixii jimcaad waxaa la sugayay ragii yiri gurigaan idin ku gubaynaa. Salaadii jimcaad xataa maalinkaas aw Abiikar wuu gafay. Odey Xuud inta aan ka ahayn, derisku daloolada guryahooda ayay ka eegayeen waxa dhici doona.

Goor ay casar liiq tahay ayay yimaadeen. Cirka oo madow, roobna la filayo dhawaan ayay gaari buuxa oo askarti Alshabaab goobti timid. Odey Xuud oo ogaa inuu ka aftahansan yahay Abiikar ayaa hiilo reerka ugu yimid.

Anigaa la hadlaya marka hore ee aamus! Ayuu Abiikar u sheegay. Markey gurigi soo galeen ayuu odey Xuud salaamay.

- Assalaamu calaykum yaa jameeca!
Wuxuu ogaa haday wacalaykum wasalaam ugu jawaabaan,asaa ay macnaheeda yaqaanan inuu reerka caawa nabadgeli doono. Waayo Wacalaykum wasalaam macnaheedu waa nabad korkiinana ha haato. Nin nabad kuugu duceeyeyna kuma dilo!

- Wacalaykum wasalaam yaa ahlul beyt ayay ku salaameen, kadibna waxay ka waraysteen reerka inay amarkoodi fuliy-

een.

- Aad iyo aad. Ayuu yiri Odey Xuud. Sidii aad na farteen ayaan yeelnay. Odeygi aad tiraahdeen ha la keeno waakan oo isagoo cisbitaalka ku jira oo ay daawo u soco-to ayaan kala soo cararnay. Gacmihii-sa ka fiiriya nabarradii ay faleebadu ku reebtay!. Intii aan la soo ordeynay ayay gabadhi nagala hareen, iyadana waan keeni doonaa ilaahay idankiis.. Laakiin waakan odeygi indhihiina ku fiiriya.

Sidi ayay habeenkaas uga tageen.

Abiikar bac dawo ah ayuu dhakhtarku soo siiyey. Sida loo qaatana waa loo soo sharaxay. Markay baxeen ayuu labo kaniini ah afka ku tuuray oo biyo ka dab ageeyey. Markay daawada kaa dhamaata-na soo noqo ayaa lagu yiri. Bil markaad joogtidna baaritaan cisbitaalka u imow.

- Gabadha anigu ma bixin! Ayuu Luul oo la jiifta habeen u sheegay. Anigoo itaal daran, nabar xun na uu ihaayo ayuu wiil meesha ka turjuma arrinka ii sheegay.

- Muxuu kuu sheegay?
- Wuxuu iisheegay inay gabadha iyo

www.bilehashi.se

ninku is doonayaan.
- Haye.
- Marka ma maya ayaan oran karaa?
- Waa may.
- Sidaasaan ku bixiyey. Laakin waa nin fariid ah. Maalintii Guduudo loo mehriyey intii ka danbeysay wuu i kaalmeeyey intii karaankiisa ah.

- Loo mehriyey? Oo adiga goobta sow ma aadan joogin?

- Maya aniga nabar baa i hayay sowtaan ku iri. Wiilka turjubaanka ah ayaan wakiishay. Mar hadii gabadhu ninka iyada ay is rabaan maxaan ugu diidaa. Inagaba waad xasuusataa sidaan isku guursanee?

Abiikar isagoo rajo iyo agoon isku ah, asaa uusan wax saas ah heysanin oo uu kirishbooy yahay gawaarida raaca ayuu arkaday Luul. Luul oo reer dhaqan oo Doogleey berigaas laga yaqaanay ka dhalatay. Waxay iibin jirtey dukaanka kaliya ee Doogleey ku yaala oo uu aabaheed lahaan jirey.
Gawaarida  Magaalada ka timaada waxay soo hor istaagi jireen oo boosteejo u ahayd dukaanka ay Luul gaddo.

Halkaas ayuu ka arkaday Luul. Markay arintooda gabogabo ahaydna aabaheed ayaa arinka is hor taagay oo diiday ninka kirishbooyga ah inuu gabadhiisa siiyo.

Wey isla fakadeen.

- Ma Guduudo inay nin la fakataad dooneysaa?

- Maya! Waa runtaa! Ayay Luul ku tiri Abiikar markii nolosheeda waayo waayo lasoo xasuusiyey.

*

Maalmihii xigay Abiikar caafimadkiisu wuu kasoo fiicnaaday. Inkastuu daal badan dareemi jirey. Faruuryahana uu biijo ku yeeshay.

Reerki lacagti ay Guduudo usoo dirtay wax badan ayay noloshooda ka bedeshay. alle barigi ay lacagta ku samaysteen ayaa alle u aqbalay.
Markuu Abiikar caafimaaday gurigiisana kusoo noqday ayay alle bari dhigteen. Culumo iyo xer ayaa geel loo qalay. Deriski baa raashinki la gaarsiiyey intey gaarto. Culumadii baa u alle barisay reerki. Alle wuu u aqbalay ducadi.



www.bilehashi.se

Welwelki iyo walbahaarkii reerka hayay yassir baa ilaah ugu bedelay. Wejiyadoodi murugeysnaa ayaa farxad la nuuray. Luul dabcigeedii hore ayaa usoo noqday.

Arliyo waxay isweydiisay dabcigii fiicnaa ee hoyadeed sababta uu u usoo noqday. Ma welwelkii masruufka cidda oo daayay mise Aabe oo usoo noqday?

Waxay ogeyd inay noloshu dhadhan fiican lahayn markuu kaa maqan yahay qofkaad jeceshahay. Wiilkii madaxeeda ka bixi waayay ayay u xiistey inay mar kale is arkaan.

Dhowr habeen oo ay u dhuumatay balliga wey kasoo weysay. Magaciisa hadii ay ogaan lahayd dad ayay sirsir u weydiin lahayd, laakiin Waatii Guduudo ay bartay inaan raga la isku jilcin.

Qolofweyni ha iga saarto caawa! Ayay isku canaanan jirtey markay habeenkiyoo dhan uu madaxeeda ka bixi waayo.

Wuxuu ku sugi jirey derinta. Wuxuu sugi jirey intii ay kasoo jiifato. Habeen kasta saas markey dhinaca dhulka usoo dhig-

to ayuu madaxeeda soo gali jirey. Xataa habeen ayuu riyada ugu yimid oo iyadoo dhidideysa soo booday. Istaaqfurulaah! intey tiri intey soo fadhiistay. Qoyaan iyo kuleyl jirkoo dhan ayay dareentay.

Afar iyo sodon habeen ayaa kasoo wareegtay habeenkii uu arkay iyadoo qaar qaawan oo biyaha ku jirta. Habeenadu wey u xisaabsanaayeen. Sadex goor oo kale ayay u dhuumatay oo xataa ay mar biyihi gashay intey dharki dhigatay. Laakiin ma uusan iman.

Tolow ma si qalafsan baan wiilka ula hadlay oo wuu iga goostay? ayay isweydiisay.

Guduudo warkeeda inaan dhagaysto ma ahayn. Malaha wiilka jileec markuu iga waayay ayuu is yiri tani waa mid qalafsan oo dabci xun?

Guduudo ayaa kaga qumanayd inay nimanka si adag ula hadasho. Wey ogayd inay Guduudo qurux la ba'an tahay. Sida Guduudo haday ahaan lahayd! ayay ku hammin jirtey. Uurka ayay iska ciili jirtey markay isku sheegto sirtaas oo aysan cid kale weligeed u sheegin.

www.bilehashi.se

Guduudo mid hadey weyso boqol kale ayaa saf ugu jira!

Guduudo waxaa loogu bixiyey dhiigeeda furan, indhaha deerada la modoo, timo jilcan ayay lahayd oo aad u baxa. Dhererka iyo dhuubnaanteeda ragu way soo eegi jireen.

Arliyo wey ogeyd inay timaheedu kuwa Guduudo gaari karin. Waxay xasuusataa mar iyadoo markaas naasuhu usoo baxeen inay jadeeco ku dhacday. Timihi ayaa laga wada xiiray. Waxay ku qaadatay gu' iyo bar intey timaheeda intey ahayeen kasoo gaaraan.

Timaha adag aabaheed ayay ka raacday. Arliyo ma gaabneyn balse markay Guduudo agtaagan tahay waxay u muuqatay inay gaaban tahay. Intaasba wey ku ximin jirtey Guduudo. Laakin weligeed uma aysan sheegin qof.

Qof qurxan wuu is macneyn karaa! Ayay isku sheegtay laakiin inaan anigu ka Guduudo dhagaysto ma ahayn.

Weligiis iima soo noqon doono!....

Magaciisi ayay damacday inay qiyaasto.... Geedi? Maya, Dugsiiye? Maya, Geele? Maya, Dayax! Alaylahee wixii la yiraahba ha la yiraahdee waxaan ula baxay Dayax!. Ayay tiri oo hoosta iskala qososhay.

Maadaama ay Guduudo ka maqnayd, derinta keligeed ayaa isku kala bixin jirtey habeenkii.

Markay dadku seexdaan, oo ay feynuusta damiso, “Dayax”na uu madaxeeda yimaado ayay ugu jecleyd.

Mugdiga ayay kula sheekeysan jirtey. Mar wey ku xanaaqi jirtey. Waxay weydiin jirtey sababta uu Balliga u iman wayay. Mar kelyaha ayuu far intuu ka galiyo qudquteyn jirey markaasey mugdiga iyadoo qosleysa is qaban jirtey.

Goormuu soo noqon doonaa? Goormuu anigoo qabaysanaya balliga iigu iman doonaa?

Iyadoo su’aalo is weydiinaysa ayuu madaxeeda siduu kusoo galay uga bixi jirey. Iyaduna halkeedaas ku gam’i jirtey.

www.bilehashi.se

§

## 8.

Guduudo.

Wax badan ayay u xiistey Doogleey. Bishii sadexaad ayaa magaalada ugu dhalatay. Aabaheed bil ka hor ayuu u ambabaxay Doogleey markuu caafimaaday. Wax war ah kama aysan heli jirin hooyadeed iyo walaalaheed.

Ninka guursaday dhib weyn ayay ku qabtay. Wuxuu sheegayo ma fahanto. Waxay usheegto ma uu fahmo. Waxaana intaa u dheer inuu u diidey inay reerkeedi soo booqato.

“Nabadaada ma suggi kari hadaad baxdid, reerkaaga iyaga ha ku soo booqdaan” ayuu ku dhihi jirey.

“Reerkeyga adiga ii keen” markay ku tirina maalinba maalin ayuu ku dhaafiyaa.

Maalintii danbe markay cidlada la adkeysan weysay ayay ka dhuumatay ninkeedi.
Goor barqo kulul ah, isagoo shaqo ku maqan ayay leyloonti Doogleey aadi jirtey raadisay. Wey ogeyd inay khatarteeda leedahay. Horta Alshabaab ma ogyihiin inay Amisom u dhaxdo?

Yaa og! Intaasoo mid xerada ciidanka ka dhex shaqeeyaba uu iyaga ka tirsan yahay! Intaasoo sheekhii mehriyeyba uu iyaga yahay. Ama turjubaanka iyada iyo ninkeeda u kala warama inuu Alshabaab u shaqeeyo.

Qof ah iyo qof aan ahayn lama kala oga!

Shuko weyn ayay jug isku siisay. Ciidankii albaabka fadhiyey ayay dhaafi weysay. Markiiba askari albaabka weyn fadhiya ayaa ku dhegay.

“Xageed u socotaa?” ayuu weydiiyey. Ma aysan fahmin hadalkiisa. Wuu gartay

www.bilehashi.se

inay tahay xaaska cusub ee Dr Baguma Namanda. Wuu is hor taagay. Inay baxdo ayuu u diiday. Iyada iyo askarigii oo weli is afgaran la', ayaa waxaa u yimid askari kale oo uu ninkeedu soo diray.

Markii xafiiska dhakhtarka la keenay wiilkii turjubaanka ahaa ayaa weydiiyey halka ay u socotay?

"Reerkeeygi ayaan u xiisay"

"Reerkaaga ma ogiye xerada ma ka bixi kartid" ayuu ninkeedi amray. Ma ogtahay xerada qof uusan ciidanku keenin ama ciidanku u fasaxin inuu baxo inuusan ka bixi karin, soona gali karin. Mar labaad hadii aad isku daydo gaalshiro ayaan ku dhigayaa ayuu ugu hanjabay.

Waxay maqli jirtey gaalshiro inuu yahay meel dadka iyagoo lugaha ka xirxiran-lagu ciqaabo.

Qolkeedii ayay iskaga noqotay. Sariirta ayay isku tuurtay oo is duubduubtay. Waa barqo kuleyl badan jiro. Ilin badan ayay barkinta ku daadisay. Wey is calool xumeysay.

Subixii danbe ayaa cisbitaalka la keenay aabaheed oo uu nabarki kusoo noqday. Xumad ayuu la jaraynayay. Bararki baa soo noqday, caloosha ayuuna ka sheeganayay.

Wey la welweshay nabarka aabaheed kusoo laba kacleeyey. Saas oo ay tahay hadana wey ku faraxsanayd inuu aabaheed kasoo ag dhawaaday, waxay isku mashquulisana ay heshay intuu maalintii ninkeedu guriga ka maqan yahay.

Inuu aabaheed soo noqday waxaa soo wargeliyey ninkeedi. Subax iyadoo barandada gurigeeda iska hor fadhisa oo waxa jidka maraya iska eegeysa ayuu u yimid.

“Aabahaa ayaa saaka la keenay cisbitaalka” ayuu u sheegay.

Waxaa caado u ahaa inay barandada iyo qolka la dejiyey ay ka dhaxayso. Dad ay la hadasho ma jirin, afki ayaa huureystay, waxayna uurka ka guban jirtey markuu xiisaha reerkeeda qabto. Subaxaas oo dhan aabaheed ayay ka fekereysay. Dartiis inay nin isaga la fac ah u guursatay ayay isku sheegaysay. Ducada

www.bilehashi.se

aabaheed inuu ilaahay u aqbalo ayay rajeyneysay.

Markiiba aabahay ha la ii geeyo ayay ka codsatay.

Markay dul timid aabaheed intey ku foorarsatay ayay wejiga ka dhunkatay.

Caloosha ayuu ka sheeganayay. Waxaad moodaa inay caloosha i qarxi rabto. ayuu ku yiri. Hawo ama dhacaan baa buuxiyey caloosha. Aad ayay ii qasmeysaa ayuu lahaa. Midni af leh in la igu jeexayo ayaan dareemayaa ayuu u sharaxay sida loo hayo. Wuu rafanayaa! marba dhinac ayuu isku gedinayaa, wuu ooynayaa, ilin ayaa wejigiisa buuxisay. Xanuun ayuu la qeylinayaa, marba carabka ayuu qaniinayaa.

Waa sakaraadkii.

Waa sakaraadkii ayay istiri. Labo kalkaaliso ayaa sariirta ku haya. Inuu sariirta ka soo dhaco ayaa loo baqayaa. Dawo xanuunka baabi'iya ayay ku dayeen. Anfac malaha! Xanuunki ayaa ka tan badiyey. Dhidid waaweyn ayaa madaxiisoo dhan qooyay. Indhuhu wey is bedeleen.

Jaalo iyo guduud ayay u dhaxeeyeen.

Oohin ayay gashay Guduudo.

Waxay jecleyd inay gurigooda joogto, inay sariirta dusheeda joogaan hooyadeed, Arliyo, Afrax iyo Xirsi. Waxay jecleyd inuu qof wehliyo.

Odey Xuud iyo wiil Doogleey bukaanka ka keenay, xerada horteeda ayaa lagu istaajiyey oo cisbitaalka inay soo galaan waa loo diidey.

Qoraxda oo kulul, cirka oo aan wax caad ah lahayn, hawaduna yar tahay ayuu aabaheed xanuunki ka dagay. Indhihiisu wey isku dhegeen. Waxay qiyaastay inuu hurday. Saas oo ay tahay marmar ayuu jirkiisu soo boodayay hadana halkiisi ku dhacayay. Sariirta ayay dul taagan tahay. Neeftiisa ayay eegtay. Sankiisa ayay gacanta u dhaweysay. Neef badan ma neefsanayo.

Wey isku naxday. Afka ayay furatay. Kalkaaliso ayaa usoo carartay. Inkastoo aysan is af fahmaynin hadana shan faroole wuu isfahmaa ayaa la yiri.

www.bilehashi.se

Aabahay ma dhintay? ayay weydiisay.

Dhakhtar Dr Baguma ayay u yeertay kalkaalisadi. Markuu yimid wuxuu xabadka fiilo ka saaray aabaheed . Dhegta ayuu ku dhagaystay wadnaha bukaanka.

Wuu istaagay. Iyada ayuu eegay. wey eegtay. calaacashiisa ayuu afka saartay. suulkiisa iyo farta ayuu labadiisa dibnood la raacay. Turjubaanki ayuu u dhawaaqay.

“Aabahaa naftu wey kasii baxaysaa”

Dadku waa ooyi jireen, wey barooran jireen, wey qeyliyi jireen, wax bay tuuri jireen. Guduudo halki ay taagnayd ayay ka dhaqaaqi weysay marki loo sheegay akhbaarta culus.

Aabaheed ayay dhinac fadhisay ilaa naftu ay ka baxday. Casarkii, qoraxdu markay qaboowday, iyadoo gacanta haysa ayuu go’ay.

Banaanka ayaa waxaa looga yeeray Odey Xuud iyo Timoweyne oo bukaanka cisbi-

taalka keenay. Waxaa loo sheegay inay meydka cisbitaalka ka bixiyaan oo soo aastaan.

Markay Timoweyne aragtay ayay damacday inay u orodo oo isku duubto, dhexda qabsato, ku dhegto oo dhegta ugu sheegto. “Iga kaxee meeshaan” Doogleey i gee!

Odey Xuud wuxuu la tashtay Guduudo. Wuxuu ku yiri aan ku aasno Xamar, Qoraxda inteysan dhicin waan ka gaarsiin karnaaye.

Wey ka diiday.

Ninkeedi ayaa soo fasaxay markay u sheegtay inay rabto inay aaska aabaheed Doogleey u raacdo.

Xaajiyo khamsiin ayey Magaalada kasoo kireysteen. Meydki ayay Doogleey usoo qaadeen. Intey dhex soo socdeen Timoweyne iyo Guduudo meydka ayay labada dhinac ka kala fadhiyeen. Wey kala aamusnaayeen. Marmar ishooda ayaa isku dhacaysay. Keligood ayay ahaayeen. Odey Xuud wuxuu fadhiyey gaariga shirkiisa. Iyaguna gadaal ayay meydka

www.bilehashi.se

labada dhinac ka kala hayeen.

“Waan maqlay in lagu guursaday” ayuu ku yiri.

Wey soo eegtay. Uma aysan jawaabin. Wuu eegay. indhaheedi cadcadaa inay oohin la guduuteen ayuu arkay.

Wey kala aamuseen.

Indhaheedi oo ilmeynaya ayuu arkay. dhabarka ayuu gacanta u mariyey. Madaxa ayuu u salaaxay. “adeer Abiikar allaha u naxariisto” Aamiin. Kitaabkiisa midigta allaha ka siiyo” aamiin, “allaha qabriga u waasiciyo” aamiin, “anagana ilaah gadaashiis nama fitneeyo” aamiin ayay afar mar u jiibisay.

Way kala aamuseen.

Marxuum Abiikar, seygii Luul, Guduudo, Arliyo, Afrax iyo Xirsi aabahood waxaa lagu aasay Doogleey, qoraxdii oo baalka dhulka lasii galaysa ayaa iilka la dhigay. Dhulka oo gudcur madow ku dhow ayay dadkii kasoo kala dareereen.

Luul iyo carruurteeda duugta way soo

raaceen. Iyaga iyo aay Faay ayaa meel fog taagnaa oo dusha ka eegayay aaska.

Dadkii markey qabriga kasoo kala dareereen ayay arkeen Odey Xuud oo qabrigii dib ugu noqday keligiis. Qabrigi korkiisa ayuu istaagay. Gacmaha ayuu kor u taagay. In badan ayuu cirka eegayay.

Habeenkaas Guduudo gurigi hooyadeed ayay seexatay. Derinti ay taqaanay, Arliyo dhinaceeda ayay seexatay.

Hadalkoodu wuu yaraa. wey daalanaayeen labadooduba. Wey argagaxsanaayeen. Wey niyad xumaayeen.

§

www.bilehashi.se

## 9.

Todobadii maalin markii tacsidi derinta loo laabay, weli ninkeedi ma aysan aadin. Isna ma uusan soo doonin.

Waxay rajeyneysay inuu sidaa uga maqnaado oo uu iska iloobo. Waxay jecleyd inay hooyadeed la joogto. Balse maalintii sadexaad ayay hooyadeed kusoo qaaday ninka guursaday iyo marka ay u noqon doonto.

Guduudo oo aad moodo caag biyo ka buuxeen oo dhinaca laga dilaacshay ayaa ilintu ka soo daadatay.

Hooyadeed wey isku naxday. Shafka ayay

ku qabatay gabadheedi. Wey ka dhagaysatay waxa ka oohiyey.

- Hooyo ninku nin fiican maaha! ayay u sheegtay. Nin aan afsoomali aqoon waaye.
- Oo ma dhagool baa ninku? ayay Luul damacday ogow.

- Ma aha dhagool laakiin afkale ayuu ku hadlaa.
- Oo sidee isku damacdeen nin aadan is fahmeynin?

- Hooyo, aabe dartiis ayaan u yeelay!

Waxay uga warrantay wixiyoo dhan. Ilaa riyadii baas oo ay riyootay ilaa maanta.

- Waxaan moodeynay inaad ninka adigu keensatay! ayay usheegtay. Waxay u sheegtay inuu aabaheed Abiikar dafiray oo uusan isaga Guduudo u guurin.

- Anigana waxay igu yiraahdeen aabahaa waan u sheegnay wuuna kuu soo duceeyey.

www.bilehashi.se

Wey isku ooyeen Luul iyo gabadheedi.

- Hada maxaan yeelnaa?

- Hooyo ma rabo inaan u noqdo! ayay go'aan cad siisay hooyadeed. Gurigaagaan joogayaa.

*

Isbuuc, labo isbuuc weli naagtiisii ma uusan soo doonan. Iyadana uma aysan bixin magaalada.

Wax walba caadi ayay kusoo noqdeen. Guduudadii la yaqaanay ayaa soo noqotay. Qosolkii, furfurnaantii, bashaashnimadeedii ayay lasoo baxday.

Hooyo markay beerta aado subixii Guduudo iyo Arliyo ayaa carruurta looga tagi jirey. Wax is bedelay malaha! Fiidkii ayay dareemi jireen inuu aabahood habeenkaas iman doonin. Inta kale nolosha sidii ay ebed ahaan jirtey ayay kusoo noqotay. Afrax iyo Xirsi banaanka ayay garangar kula cayaari jireen carruurta eedo Saree-

do. Arliyo iyo Guduudo derintoodi ayay seexdaan. Timaha ayay isku dabaan. Ceelka ayay biyaha kasoo dhaanshaan. Guriga ayay xaaqaan oo bilbilaan inta aysan hooyo beerta kasoo noqon.

Habeenkii dambe ayay Arliyo ka codsatay inay Guduudo u raacdo cayaar caawa howdka ka dhacaysa.

Dhalinyaro badan ayaa soo guudi doonta caawa ayay tiri. Mid baan meesha ku ballansanahay. Inaad i raacdo ayaan rabaa ayay Guduudo ka codsatay.

- Mid! hehehe warka igu taabo bol!

- Dayax baan marki hore ula baxay kow dheh, laakin waxaa layiraah Daahir! ayay Arliyo sirta u sheegtay Guduudo iyadoo xishoonaysa.

- Daahir ayo?
- Daahir Kaahiye Biixi! ayay u abtirisay. walaasheedna tustay inay wiilka si fiican u taqaano.

Guduudo wey taqaanay reer Kaahiye Biixi inay reer Doogleey ahaayeen. Wiilkana korka wey ka taqaanay. “haye in-

www.bilehashi.se

taan maqnaa miyuu ku damcay" marki hore aniga ayuu malaha iga baqi jirey.

Wey wada qosleen.

Goobtii cayaarta ayay hebeenkaas u dhuunteen. Wax isbedelay malaha! Wax walba sidi hore ay u ahaayeen ayay ku-soo noqdeen.
Gurigi Aay Faay ayay la leexdeen, Dooxi iyo balligiba wey dhaafeen ilaa goobtii cayaarta ayay qoslayeen.

Goobtii dhalintu buuxday markii la yimid ayay Guduudo is iloowday oo booday cayaarti. Wiilashi qaar baa ka qajilay inay la boodaan gabar la qabo. Qaar waxayba isweydiinayeen waxa meesha keenay.

Arliyo iyo Daahir oo gacmaha isqabsaday,dhalinti kalena ka yara fogaaday oo meel keligood fadhiya ayaa waxaa usoo qeyliyey gabdhihi kale.

Soo orod walaashaa wey suuxdaye!

Sidey u boodeysay oo ay jaanta dhulka ula heleysay ayay mar qudha dhulka ku dhacday.

Wiilal meesha joogay ayaa biyo ku bilbilay. Markay soo toostay waxaa labada garab qabtay Timoweyne iyo Daahir. Arliyo oo dhinac socota labada wiil ayay gurigoodi geeyeen.

Hooyadood oo kusoo toostay ayaa loo sheegay waxa gabadheeda ku dhacay.

Wiilashi markey baxeen weli Guduudo caloosha ayay heysatay!. Dhowr mar ayay dadkoo jiifa musqusha usoo carartay.

“dhiig badan ayaa iga socda” ayay hooyadeed u sheegtay subixi.

Uur amaad leedahay? ayay weydiisay

§DHAMAAD§

www.bilehashi.se

**Qisada oo kooban:**

Guduudo markay aabaaheed oo xanuun la ildaran magaalada usoo qaado waxaaa cisbitaalka ku qaabilaya Dhakhtar Ugaandhees ah. Kaas oo ku xujeynaya inay guursato isaga hadii ay doonayso in aabaheed loo daweeyo.
Turjubaanka ayaa kusii qalqaalinaya: Dawo uma iibin kartid aabahaa, dibedana uma qaadi kartid, awoodaas ma lihid, aabahaana xanuun uusan xamili karin ayaa haya. Muxuu aabahaa kuu dhalay? Sow curradiisa ma tihid?

*Qiso xanuun badan!*

*Waa Qiso qalbiga iyo laabta taabanaysa.*

*Mycket spännande och fascinerande historia!*

HOTEL AMISOM
BILE HASHI



**Bile Hashi** wuxuu ka mid yahay Qoraayaasha qarnigan ku-wooda loogu qadarin og yahay. Waa Qoraaga loogu akhriska badan yahay qaarada Yurub, khaasatan wadanka Sweden. Halkaa oo uu yimid isagoo 16 jir ah..

Aalaaba Bile waxuu wax ka qoraa taariikhda cusub ee dadka iyo dalka Soomaaliyeed, khaasatan taariikhda qurbojoogta. Qoraagu wuxuu ka qalinjabiyey Jaamicada Göteborg University kulliyadeeda culuunta dhaqaalaha. Wuxuu kaloo Master degree ka heystaa Jaamicada Injineeriya ee isla jaamicadaas.

**Hotel Amisom (2016)** waa buugii labaatanaad oo Bile Hashi uu qoro!

Buugaagta kale uu uu Qoray Bile Hashi, lana mid ah Buugan:

1. Janno
2. Deynabo
3. Sidey noqonba mooyee!
4. Maxbus Nr77
5. Hammi Aduun & Haasaawe Jaceyl
6. Xusuusqorkii Leyla
7. Shan Habeen
8. Intuu Dahabku lacagta dheeryahay Dumarka dheertahay
9. Wejibuug
10. Calaf
11. Qorbo joog & Qarax U joog
12. Mukhalas